



# Buug Tusmeedka Shaqaalaha Bilaa Camalka ah Tusmo ku aadan Dheefaha Shaqo



**Employment Security Department**  
WASHINGTON STATE

**Oktoobar 2025**

Buug-tusmeedkaan waa xog bixiye keliya. Haddii ay iskhilaafto xogta buug tusmeedkaan iyo sharciga gobalka Washington ee hadda, sharciga ayaa awooda leh.



# Nuxurkaww

Ku saabsan buug-gacmeedka .....	1
Hel xog dheeraad ah .....	1
Guudmarka Caymiska Shaqo la'aanta .....	2
Ku saabsan barnaamijka .....	2
Waxaan u joognaa inaan ku caawino.....	2
U qalmidda.....	3
U qalmida dheefaha shaqo la'aanta.....	3
Xaaladaha gaarka ah.....	5
Codso dheefaha.....	5
Macluumaadka aad u baahan tahay si aad u codsato dheefaha.....	6
Oonlayn ka codso .....	8
Taleefanka ka codso .....	9
Dookhyada gelitaanka mushaarka.....	9
Kadib marka aad codsato dheefaha .....	10
Heeganka.....	11
Qadarka dheefaha.....	11
Lacagaha la jaro .....	12
Soo gudbi codsigaaga toddobaadlaha ah .....	13
Shaqo raadi.....	14
Soo gudbiso codsigaaga toddobaadlaha ah.....	14
Soo sheeg lacagaha aad heshay. ....	17
Ku soo noqoshada shaqada .....	18
Adeegyada dib u shaqaalaynta.....	18
Marka aad hesho shaqo cusub .....	19
Dib u bilaabidda codsigaaga.....	20
Xuquuqda racfaanka.....	21
Sida loo gudbiyo racfaan .....	21
Macluumaadka aad ugu baahan tahay racfaankaaga .....	22
Kadib markaad xareyso racfaan .....	23
Xaq u yeelo inta lagu jiro racfaankaaga .....	23
Tuugada dheefaha .....	24
Ganaaxyada khiyaanada dheefaha .....	24



Kose mochen awora eom fansoun eom kopwe aneani ewe puukena annuk. A kan aweweni eom pung kena me pwan met kopwe forori kena ika pwe ka aeoeo ren me pwan angei aninis kena. Ren aninis kena ese wor momon non fosun Spein, kori 800-318-6022. Ren aninis kena ese wor momon non pwan ekkoch fosun fonu kena, kori 800-410-0758. Ika pwe a wor ew eom teririn rongorong ika kapas, dialeni 711 ren eom kopwe tori ewe Washington Relay.

لطفاً برای مطالعه این کتابچه راهنما وقت بگذارید. در صورت درخواست و دریافت مزایا، حقوق و مسئولیت‌های شما را شرح می‌دهد. برای دریافت کمک به زبان اسپانیایی، با شماره 800-318-6022 تماس بگیرید. برای دریافت کمک به سایر زبان‌ها، با شماره 800-410-0758 تماس بگیرید. اگر معلولیت شنوایی یا گفتاری دارید، برای تماس با رله را شماره گیری کنید Washington 711

Veillez lire attentivement le présent manuel. Vous y trouverez des explications sur vos droits et vos responsabilités si vous déposez une demande de prestations et si vous en bénéficiez. Si vous souhaitez obtenir une assistance gratuite en espagnol, veuillez appeler le 800-318-6022. Si vous souhaitez obtenir une assistance gratuite dans une autre langue, veuillez appeler le 800-410-0758. Si vous êtes malentendant ou avez des difficultés d'élocution, veuillez composer le 711 pour joindre le service de relais de Washington

Bitte nehmen Sie sich die Zeit, dieses Handbuch zu lesen. Es erklärt Ihre Rechte und Pflichten, wenn Sie Leistungen beantragen und erhalten. Kostenfreie Hilfe auf Spanisch erhalten Sie unter 800-318-6022. Kostenfreie Hilfe in anderen Sprachen erhalten Sie unter 800-410-0758. Wenn Sie eine Hör- oder Sprachbehinderung haben, wählen Sie 711, um die Zentrale in Washington zu erreichen.

Prenditi il tempo necessario per leggere questo manuale. Spiega quali sono i tuoi diritti e le tue responsabilità se ti registri e quali benefici riceverai. Per ricevere aiuto in spagnolo, chiama il numero 800-318-6022. Per ricevere aiuto in altre lingue, chiama il numero 800-410-0758. Se possiedi una disabilità uditiva o vocale, Digita 711 per contattare il servizio di assistenza telefonica di Washington.

このハンドブックをしっかりとお読みください。このハンドブックはあなたが給付金を申請し、受給する場合の権利と責任について説明しています。スペイン語での無料のヘルプは、800-318-6022 までお電話ください。その他の言語による無料のヘルプは、800-410-0758 までお電話ください。聴くことや話すことが困難な方は、711 をダイヤルして Washington リレーにご連絡ください。

សូមចំណាយពេលវេលាអានសៀវភៅណែនាំនេះ។ សៀវភៅនេះពន្យល់អំពីសិទ្ធិ និងទំនួលខុសត្រូវរបស់អ្នក ប្រសិនបើអ្នកដាក់ពាក្យសុំ និងទទួលបានអត្ថប្រយោជន៍។ សម្រាប់ជំនួយដោយឥតគិតថ្លៃជាភាសាអេស្ប៉ាញ សូមហៅទូរសព្ទទៅលេខ 800-318-6022។ សម្រាប់ជំនួយឥតគិតថ្លៃជាភាសាផ្សេងទៀត សូមហៅទូរសព្ទទៅលេខ 800-410-0758។ ប្រសិនបើអ្នកមានពិការភាពនៃការស្តាប់ ឬនិយាយ សូមហៅទូរសព្ទទៅលេខ 711 ដើម្បីទាក់ទងសេវាបញ្ជូនបន្តរបស់រដ្ឋ Washington។

이 핸드북을 읽어보시기 바랍니다. 혜택을 신청하고 받는 경우 자신의 권리와 책임에 대해 설명해 드립니다. 스페인어로 무료 도움을 받으려면 800-318-6022 로 전화하세요. 다른 언어로 무료 도움을 받으려면 800-410-0758 로 전화하세요. 청각 또는 언어 장애가 있는 경우 711 번으로 전화하여 Washington 릴레이에 연결하세요.

ກະລຸນາເສຍສະຫຼະເວລາອ່ານປຶ້ມຄູ່ມືເຫຼົ່ານີ້. ອະທິບາຍສິດທິ ແລະ ຄວາມຮັບຜິດຊອບຂອງທ່ານຖ້າວ່າທ່ານສະໝັກ ແລະ ຮັບສະຫວັດດີການ. ສໍາລັບການຄວາມຊ່ວຍເຫຼືອພຣີ ເບັບພາສາສະເປນ, ໂທ 800-318-6022. ສໍາລັບການຄວາມຊ່ວຍເຫຼືອພຣີ ເບັບພາສາອື່ນໆ, ໂທ 800-410-0758. ຖ້າວ່າທ່ານມີຄວາມພິການທາງດ້ານການໄດ້ຍິນ ຫຼື ການປາກເວົ້າ, ກົດໂທ 711 ເພື່ອຕິດຕໍ່ Washington Relay (ວໍຊິງຕັນ ຣີເລ).

Maaloo yeroo fudhadhaatii kitaaba qajeelchaa kana dubbisaa. Kaffaltii beenyaa/faayidaaleedhaaf yoo iyyattanii fi argattan mirgaa fi itti gaafatamummaa keessan ni ibsa. Gargaarsa bilisaa afaan Ispeeniin argachuudhaaf, 800-318-6022 irratti bilbilaa. Gargaarsa bilisaa afaanota birootiin argachuuf, 800-410-0758 irratti bilbilaa. Rakkoo dhageettii ykn dubbachuu yoo qabaattan, 711 irratti bilbiluun tajaajila ergaa daddabarsuu qaama miidhamtootaa Washington argadhaa.

ਕਿਰਪਾ ਕਰਕੇ ਇਸ ਕਿਤਾਬ 'ਤੇ ਪੜ੍ਹਨ ਲਈ ਸਮਾਂ ਕੱਢੋ। ਜੇ ਤੁਹਾਨੂੰ ਲਾਭਾਂ ਲਈ ਅਰਜ਼ੀ ਦਿੰਦੇ ਹੋ ਅਤੇ ਉਹਨਾਂ ਨੂੰ ਪ੍ਰਾਪਤ ਕਰ ਲੈਂਦੇ ਹੋ ਤਾਂ ਇਹ ਤੁਹਾਡੇ ਅਧਿਕਾਰਾਂ ਅਤੇ ਜ਼ਿੰਮੇਵਾਰੀਆਂ ਬਾਰੇ ਦੱਸਦਾ ਹੈ। ਸਪੈਨਿਸ਼ ਵਿੱਚ ਮੁਫਤ ਸਹਾਇਤਾ ਲਈ, 800-318-6022 'ਤੇ ਕਾਲ ਕਰੋ। ਦੂਜੀਆਂ ਭਾਸ਼ਾਵਾਂ ਵਿੱਚ ਮੁਫਤ ਸਹਾਇਤਾ ਲਈ, 800-410-0758 'ਤੇ ਕਾਲ ਕਰੋ। ਜੇ ਤੁਸੀਂ ਸੁਣਨ ਜਾਂ ਬੋਲਣ ਤੋਂ ਅਪਾਰਜ ਹੋ, ਤਾਂ Washington ਰੀਲੇਅ ਨਾਲ ਸੰਪਰਕ ਕਰਨ ਲਈ 711 ਨੂੰ ਡਾਇਲ ਕਰੋ।

Пожалуйста, найдите время, чтобы прочитать это руководство. В нем объясняются ваши права и обязанности, если вы подаете заявление на получение пособия и получаете его. Чтобы получить бесплатную помощь на испанском языке, позвоните по телефону 800-318-6022. Для получения бесплатной помощи на других языках звоните по телефону 800-410-0758. Если у вас проблемы со слухом или речью, наберите 711, чтобы связаться с ретрансляционной службой штата Washington.

Fa'amolemole faaalu se taimi e faitau ai lenei tusi taulima. O lo o fa'amatala mai ai au aia tatau ma matafaioi pe a e talosaga mo le mauaina o fa'amanuiaga. Mo se fesoasoani maua fua i le faa-Sipaniolo, valaau le 800-318-6022. Mo se fesoasoani maua fua i isi gagana, valaau le 800-410-0758. Afai e le atoatoa lau fa'alogo po o le tautala, vili le 711 mo le Taavale Washington.

Fadlan wakhti u samee akhrinta buugan. Waxa uu sharaxayaa xuquuqdaada iyo masuuliyadahaaga hadii aad dalbanayso oo aad qaadato gunooyinka. Wixii kaalmada bilaashka ah ee Isbaanishka ah, la hadal 800-318-6022. Wixii kaalmada ah bilaash ah ee luuqadaha kale ah, la hadal 800-410-0758. Hadii aad qabto laxaad la'aan maqalka ama hadalka ah, garaac 711 si aad ula xidhiidho Gudbinta Washington.

Por favor, tómese el tiempo para leer este manual. Este explica sus derechos y responsabilidades si solicita y recibe beneficios. Para recibir ayuda gratuita en español, llame al 800-318-6022. Para recibir ayuda gratuita en otros idiomas, llame al 800-410-0758. Si tiene una discapacidad auditiva o del habla, marque el 711 para comunicarse con el Servicio de Retransmisión de Washington.

በጃኹም ግዜ ወሲታዎን ነዚ መምርሒ መጽሓፍ ኢንብብዎ። እዚ ንመሰላትን ሓላፍነታትንኩም የረድእ፣ እንተደካ ሓገዝ ሓቲትኩምን ተቐብሊኩምን ። ብቋንቋ ስፓኒሽ ብናጻ ሓገዝ እንተ ደሊኹም፣ ናብ 800-318-6022 ደውሉ። ብሻልክ ቋንቋታት ብናጻ ሓገዝ እንተ ደሊኹም፣ ናብ 800-410-0758 ደውሉ። ናይ ምስማዕ ወይ ናይ ምዝራብ ጸገም ምስ ዝህልዎኩም፣ ናብ Washington ሪሌይ ንምብጻሕ ናብ 711 ደውሉ።

Mangyaring maglaan ng oras upang basahin ang handbook na ito. Ipinaliliwanag nito ang iyong mga karapatan at pananagutan kung mag-aaplay ka at makakatanggap ng mga benepisyo. Para sa libreng tulong sa wikang Spanish, tumawag sa 800-318-6022. Para sa libreng tulong sa ibang wika, tumawag sa 800-410-0758. Kung mayroon kang kapansanan sa pandinig o pagsasalita, i-dial ang 711 upang makontak ang Washington Relay

Будь ласка, знайдіть час, щоб прочитати цей посібник. У ньому пояснюються ваші права та обов'язки, якщо ви подаєте заяву на отримання виплат і отримуєте їх. Для отримання безкоштовної допомоги іспанською мовою зателефонуйте за номером 800-318-6022. Для отримання безкоштовної допомоги іншими мовами зателефонуйте за номером 800-410-0758. Якщо у вас є проблеми зі слухом або мовленням, наберіть 711, щоб подзвонити до ретрансляційної служби штату Washington.


Vui lòng dành thời gian đọc sổ tay này. Sổ tay này giải thích các quyền và trách nhiệm của quý vị nếu quý vị nộp đơn xin và nhận trợ cấp. Để được trợ giúp miễn phí bằng tiếng Tây Ban Nha, hãy gọi 800-318-6022. Để được trợ giúp miễn phí bằng các ngôn ngữ khác, hãy gọi 800-410-0758. Nếu quý vị bị khiếm thính hoặc khiếm ngôn, hãy gọi 711 để liên hệ với Dịch Vụ Chuyển Tiếp Viễn Thông Washington.


## Muhiim

Employment Security Department (Waaxda Amaanka Shaqada) waa shaqo-bixiye/barnaamij loo siman yahay. Kaalmooyinka iyo adeegyada kaalmada ayaa la heli karaa marka ay codsadaan shakhsiyaadka naafada ah. Waxaanu ku bixinaa caawimo bilaash ah oo luuqado badan. Haddii aad qabto naafo maqal ama hadal, wac 711 si aad u hesho Washington Relay.

Waxaad nuqul ka mid ah buug-gacmeedkan ka heli kartaa xarunta WorkSource ee deegaankaaga. Ama waxaad codsan kartaa nuqul adiga oo wacaya Employment Security Department (Waaxda Amaanka Shaqada) lambarka [800-318-6022](tel:800-318-6022) (Washington Relay 711). Si aad u codsato macluumaadka ku qoran buug-gacmeedka oo luuqad kale ah, wac [800-410-0758](tel:800-410-0758).

# Ku saabsan buug-gacmeedka

Buug-gacmeedkani waxa uu bixinayaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan dheefaha [shaqo la'aanta](#) , oo ay ku jiraan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga. Fadlan hubi inaad akhrido oo aad fahamto macluumaadkan si ay kaaga caawiyaan inaad si guul leh u codsato dheefaha.

Erayada hoosta laga xarriiqay oo ay raacsan tahay astaanta buug  waxaa lagu qeexay qaamuuska. Qaamuusku wuxuu ku jiraa Lifaafa B, oo u dhow dhammaadka buug-gacmeedka. Waxaad ka heli kartaa qeexitaannada erayada dheeraadka ah bogga internetka ee Amniga Shaqada oo ah [esd.wa.gov/about-us/definitions-terms](https://esd.wa.gov/about-us/definitions-terms).

Haddii aad weli su'aalo qabto ama aad u baahan tahay caawimo, fadlan la xidhiidh Washington State Employment Security Department (Waaxda Amaanka Shaqada ee Gobalka ESD). Waxaad nagala xiriiri kartaa dhowr siyaabood.

## Hel xog dheeraad ah

---



### Nagu soo booqo oonlaynka

Booqo [esd.wa.gov](https://esd.wa.gov).



### Naga soo wac

Saacadaha shaqada ee hadda ee Xarunta Dacwadaha, fadlan ka eeg boggayaga internetka oo ah [esd.wa.gov/contact](https://esd.wa.gov/contact).

Wac [800-318-6022](tel:800-318-6022) ee Luuqadda Ingiriis ama Isbaanishka.

Haddii aad qabto naafo maqal ama hadal, wac 711 si aad u hesho Washington Relay.

Wac [800-410-0758](tel:800-410-0758) ee luuqadaha aan Ingiriisiga iyo Isbaanishka ahayn.



### Booqo xarunta WorkSource

Caawinta shaqo raadintaada, fursadaha tababarka, macluumaadka aasaasiga ah ee ku saabsan faa'iidooyinka shaqo la'aanta iyo helitaanka kombuyuutar ammaan ah.

Si aad u hesho xarun kuu dhow, booqo [Worksourcewa.com](https://Worksourcewa.com).

## Adeegyada

Haddii aad qabto naafo ama xaalado kugu adkaynaya inaad telefoon ama oonlayn ku codsato, ama haddii aad u baahan tahay buug-gacmeedkan oo qaab kale ah, nala soo xidhiidh:

- limeylka [ESDGPUIAccomms@esd.wa.gov](mailto:ESDGPUIAccomms@esd.wa.gov).
- Ka wac [844-395-6698](tel:844-395-6698) (Washington Relay 711).

# Guudmarka Caymiska Shaqo la'aanta

## Ku saabsan barnaamijka

---

Dheefta shaqo la'aantu waxay ku siinaysaa dakhli ku meel gaadh ah marka aad waydo shaqadaada, ama saacadahaaga la dhimo, adiga oo aan khaladka lahayn. Dheefahaani waxay kaa caawin karaan inay ku taageeraan markaad shaqo raadinayso. Dheefuhu kuma salaysna baahidaada dhaqaale.

## Maalgelinta barnaamijka

Barnaamijkeena caymiska shaqo la'aanta ee gobolka waxaa lagu maalgeliyaa cashuuraha ay bixiyaan loo-shaqeeyayaasha. Wax lacag ah lagama gooyo jeegaaga mushaharka si aan ugu bixino dheefaha.

## Si aad u heho adeegga ugu dhaqsiiyaha badan, gal oonlaynka

Waxaad codsan kartaa dheefaha, xerayn kartaa codsigaaga toddobaadlaha ah, hubinta kartaa heerka codsigaaga, codsan kartaa macluumaad iyo wax ka badan oo kale adigoo u maraya shabakadeena badbaadada iyo amaanka leh. Waxaa la yiraahdaa eServices. Gal barta eServices [secure.esd.wa.gov](https://secure.esd.wa.gov) 24 saac maalintii/7 maalmood asuucii.

## Waxaan u joognaa inaan ku caawino

---

In aan si degdeg ah oo sax ah dheefahaaga kuu siino waa mudnaantayada koowaad. Waxaa laga yaabaa inaan u baahanahay macluumaad dheeraad ah si aan uga baaraandegno codsigaaga ama sheegashooyinka toddobaadlaha ah. Fadlan si degdeg ah uga jawaab codsi kasta oo macluumaad,

Waxaad u baahan tahay inaad:

- Bixiso macluumaad sax ah.
- Aad si joogto ah u eegto boostadaada, iimeylkaaga iyo ogeysiisyada eServices.
- Buuxiso dhammaan shuruudaha si aad xaq ugu yeelato dheefaha, sida lagu qeexay buug-gacmeedkan.
- Macluumaadkaaga xiriirka ka dhigto mid cusub.

### Muhiim

Haddii aad beddesho ciwaankaaga, taleefoon lambarkaaga ama iimaylkaaga, noo soo sheeg sida ugu dhakhsaha badan. Haddii kale, waxaa laga yaabaa in dheefahaaga dib loo dhigo ama la diido. Habka ugu fudud ee lagu **cusboonaysiin karo macluumaadkaaga** waa oonlaynka. Booqo [secure.esd.wa.gov](https://secure.esd.wa.gov) si aad u gasho akoonkaaga eServices.


# U qalmidda

## U qalmida dheefaha shaqo la'aanta

Sida ugu fiican ee lagu ogaan karo inaad xaq u leedahay dheefaha waa inaad codsato. Wakaaladayadu waxay dib u eegtaa codsi kasta si gaar ah si ay u go'aamiso haddii aad u qalanto. Waxaan eegeynaa 3-daam arrimood:



### Intee in le'eg ayaad shaqeysay 18-kii bilood ee kahoreeyay inta aadan codsan dheefaha?

- Waxaad u baahan tahay inaad shaqeysay ugu yaraan 680 saacadood [sanadka aasaasiga ah](#) .
- Waxaad u baahan tahay inaad ku kasbatay ugu yaraan qayb ka mid ah mushaharkaaga gobolka Washington.

Haddii aadan hubin inaad haysato saacado kugu filan iyo in kale, codso si aanu dib kuugu eegno.



### Maxaad ugu shaqayn wayday hadda loo shaqeeyahaagii hore?

Waxaan ku weydiin doonaa sababta aadan u shaqayn ama sababta loo-shaqeeyahaagu u dhimay saacadahaaga. Tani waxay naga caawin doontaa inaan go'aan ka gaarno haddii aad u qalanto dheefaha.


Dadku waxay leeyihiin sababo badan oo ay shaqada uga tagaan ama uga baxaan. Iyadoo ku xiran sababtaada, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto dheefaha shaqo la'aanta.

Ka raadi wax badan oo ku saabsan ka saarida shaqada iyo u-qalmitaanka webseedkeena. Booqo [esd.wa.gov/eligibility](http://esd.wa.gov/eligibility) oo hoos ugu dago qaybta "Reason you separated from your job (Sababta aad shaqadaada uga tagtay)".



### Ma awoodaa oo diyaar ma u tahay inaad shaqeyso?

Si aad ugu qalanto dheefaha waxaad u baahan tahay:

- Inaad si toos ah u radinayso [shaqo kugu haboon](#) , ilaa inaan si kale kuu sheegnay maahee.
- Maskax ahaan iyo jir ahaanba awood u leedahay inaad shaqeyso.
- Si sharci ah laguugu oggolaaday in aad ka shaqeyso Maraykanka.
- Aad diyaar u tahay aqbalaada shaqada cusub. Tusaale ahaan, aadan lahayn mas'uuliyad shakhsi ah oo kaa hortaagan inaad shaqeyso.

## Sanadkaaga aasaasiga ah

Markaad codsato dheefaha, waxaanu eegnaa tirada saacadaha aad shaqeysay sanadkaaga aasaasiga ah.

Waxaad u baahan tahay inaad ka shaqeysay 680 saacadood [shago caymis leh](#) inta lagu jiro sanadkaaga aasaasiga ah si aad xaq ugu yeelato dheefaha shaqo la'aanta.

Sannad kasta waxa loo qaybiyaa 4 rubuc.


Rubaca 1	Janaayo 1 ilaa Maarso 31
Rubaca 2	Abril 1 ilaa Juun 30
Rubaca 3	Luuliyo 1 ilaa Sebteembar 30
Rubaca 4	Oktoobar 1 ilaa Diseembar 31

Sanadkaaga [aasaaska](#) waa 4 koobaad ee 5 rubuc ee aad dhamaysatay kahor asbuuca Codsigaagu bilowday.

Tusaale ahaan, shaxdani waxa ay tuseysaa waxa uu noqon doono sanadkaaga gundhigga haddii aad bilowdo sheegashadaada inta lagu jiro rubuc gaar ah.

Haddii sheegashadaadu bilaabanto inta u dhaxaysa Janaayo iyo Maarso 2025	Sannadkaaga aasaasiga ahi wuxuu ahaan doonaa Oktoobar 2023 illaa Sebteembar 2024
Haddii sheegashadaadu bilaabanto inta u dhaxaysa Abril iyo Juun 2025	Sannadkaaga aasaasiga ahi wuxuu noqon doonaa Janaayo ilaa Diseembar 2024
Haddii sheegashadaadu bilaabanto inta u dhaxaysa Luuliyo iyo Sebteembar 2025	Sannadkaaga aasaasiga ahi wuxuu ahaan doonaa Abril 2024 illaa Maarso 2025
Haddii sheegashadaadu bilaabanto inta u dhaxaysa Oktoobar iyo Diseembar 2025	Sannadkaaga aasaasiga ahi wuxuu ahaan doonaa Luuliyo 2024 illaa Juun 2025

## Alternate base year (Sanadka aasaaska ee gaarka ah, ABY)

Haddii aadan shaqaynin 680 saacadood inta lagu gudajiray sannadka aasaasiga ah ee caadiga ah, waxaad codsan kartaa inaad isticmaasho [sanadka aasaaska gaarka ah](#) . Gobolka Washington, **sanadka aasaaska beddelka ah waa 4-tii rubuc ee ugu dambeeyay ee la dhammeeyay** kahor toddobaadka sheegashadaadu bilaabanto.

Tusaale ahaan, shaxdani waxa ay tuseysaa waxa uu noqon doono sanadkaaga gundhigga badelka ah haddii aad bilowdo sheegashadaada inta lagu jiro rubuc gaar ah.

Haddii sheegashadaadu bilaabanto inta u dhaxaysa Janaayo iyo Maarso 2025	Sannadkaaga aasaasiga ahi wuxuu noqon doonaa Janaayo ilaa Disembar 2024
Haddii sheegashadaadu bilaabanto inta u dhaxaysa Abriil iyo Juun 2025	Sannadkaaga aasaasiga ahi wuxuu ahaan doonaa Abriil 2024 illaa Maarso 2025
Haddii sheegashadaadu bilaabanto inta u dhaxaysa Luuliyo iyo Sibteembar 2025	Sannadkaaga aasaasiga ahi wuxuu ahaan doonaa Luuliyo 2024 illaa Juun 2025
Haddii sheegashadaadu bilaabanto inta u dhaxaysa Oktoobar iyo Diseembar 2025	Sannadkaaga aasaasiga ahi wuxuu ahaan doonaa Oktoobar 2024 illaa Sebteembar 2025

Waxaad ka heli kartaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sanadkaaga aasaasiga ah barta [esd.wa.gov/base-year](http://esd.wa.gov/base-year).

## Xaaladaha gaarka ah

Waa inaad weli dalbataa haddii aad ku sugan tahay hal ama labada xaaladood ee hoose:

- Aad qabto xaalad caafimaad oo saamaynaysa nooca shaqada aad qaban karto.
- Saacadahaaga shaqadu ay xaddidan yihiin sababtoo ah waxaad daryeeshaa qof.

Waxaan dib u eegi doonaa xaaladaada si aan u aragno inaad u qalanto iyo in kale.

Haddii mid ka mid ah xaaladahan ay ku khusayso, waxa laga yaabaa inaad u qalanto Fasaxa Qoyska ee Mushaarka leh iyo Paid Leave (Fasaxa Caafimaadka) taas beddelkeeda. Xog dheeri ah ka fiiri [paidleave.wa.gov](http://paidleave.wa.gov).


Ma wada qaadan kartid dheefaha shaqo la'aanta iyo Paid Leave isku mar. Haddii aad qaadato labadaba dheefaha isku mar waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad celiso dheefaha shaqo la'aanta.

## Codso dheefaha

Talaabada ugu horeysa ee geedi socodka waa in la codsado dheefaha. Employment Security (Amaanka Shaqada) ayaa dib u eegi doona faahfaahinta aad ku bixisay codsigaaga. Waxaan go'aamin doonaa inaad xaq u leedahay dheefaha iyo inta aad xaq u leedahay inaad hesho.

Codsiga dheefuhu had iyo jeer waa bilaash. Haddii qof uu isku dayo inuu lacag kugu soo dallaco si aad u codsato, dheh maya! Waa tuug.

## Sanadkaaga dheefta

Sanadkaaga [dheefta](#) , oo sidoo kale loo yaqaanno sannadka sheegashada, waa muddada 52-usbuuc ah marka aad u-qalanto inaad hesho dheefaha codsigaga. Caadiyan waxay bilaabataa Axadda toddobaadka marka koobaad ee aad codsato dheefaha.

Caadi ahaan waxaad heli doontaa ilaa 26 toddobaad oo dheefo joogto ah inta lagu jiro sanadkaaga dheefta.

## Haddii aad u baahan tahay inaad saxdo codsigaaga

Haddii aad oonlaynka ka codsato oo aad rabto inaad wax ka beddesho codsigaaga, waxaad u baahan tahay inaad taas samayso kahor intaadan gudbin. Si aad isbeddel u samayso kadib markaad gudbiso codsigaaga, waxaad u baahan tahay inaad ka wacdo Unemployment Claims Center (Xarunta Codsiyada Dheefaha Shaqo La'aanta) lambarka [800-318-6022](tel:800-318-6022). Waxaan u baahanahay xog sax ah si aan u go'aamino u-qalmitaankaaga.

### Muhiim

Si aad xaq ugu yeelato lacagaha dheefaha ee toddobaadlaha ah, waxaad u baahan tahay sidoo kale inaad:

- Buuxiso shuruudaha shaqo raadintaada toddobaadlaha ah, sida lagu faray.
- Soo gudbiso codsigaaga toddobaadlaha ah.

Faahfaahin dheeraad ah ka hel qaybta "File weekly claims (gudbi sheegashada asbuuc kasta)" ee buug-gacmeedkan.

## Macluumaadka aad u baahan tahay si aad u codsato dheefaha

Kahor intaadan codsan, diyaarso macluumaadka soo socda:



### Xogtaada shaqsiga ah

- Magaca buuxa, isla sida uu ugu qoran yahay kaarkaaga Social Security.
- Taariikhda dhalashada.
- Lambarka Social Security.
- Aqoonsiga muwaadinimo. Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah, waxaad u baahan doontaa macluumaadkaagii ugu dambeeyay ee oggolaanshaha shaqada. Waxaad u baahan tahay macluumaadka xagga hore iyo dambe ee kaadhkaaga oggolaanshaha shaqada.
  - Ka hel macluumaadka ku saabsan dukumeentiga la aqbalayo barta [esd.wa.gov/citizenship](https://esd.wa.gov/citizenship).
- Xogtaada xiriirka.
  - Ciwaanka boostada.
  - Lambarka taleefanka.
  - Ciwaanka iimeylka.
- Koontadaada bangiga ama ururka deymaha iyo nambarada ruutinka, haddii aad rabto inaad dheefahaaga ku hesho koonto toos ah. Lacag ku shubista tooska ah ayaa laga heli karaa onlayn.
  - Xog badan ka ogoow sida la iskaga qoro lacag shubista tooska ah [esd.wa.gov/debit-card-info](https://esd.wa.gov/debit-card-info).
- Shatiga ama aqoonsiga gobolka Washington. Uma baahnid inaad midna haysato. Laakiin haddii aad haysato, bixi macluumaadka.

## Muhiim

**Sheeg magacaaga isla sida uu ugu qoran yahay kaarkaaga Social Security.**

Tusaale, haddii kaarkaaga Social Security ay ku qoran tahay Robert T Smith, adeegso magaca ku qoran codsigaaga. Ha adeegsan Robert Smith ama Bob Smith.


Haddii aad guursatay ama aad bedeshay magacaaga sharciga ah laakiin aadan ku cusboonaysiin Social Security Administration (Maamulka Amaanka Bulshada), isticmaal magaca dokumentigaaga aqoonsiga.



## Taariikhdaada shaqo ee 18 bilood ee la soo dhaafay

- Magacyada iyo ciwaannada boostada ee dhammaan loo-shaqeeyayaashaa laga soo bilaabo 18 bilood ee la soo dhaafay, oo ay ku jiraan shaqooyinka nuska ah iyo kuwa ku meel gaarka ah.
  - Taariikhaha aad u shaqeysay shaqo-bixiye kasta 18-kii bilood ee la soo dhaafay. Haddii aadan hayn taariikho sax ah, isticmaal qiyaastaada ugu fiican.
  - Haddii aad weli shaqaynayso, isticmaal taariikhda ugu dambeysay ee aad shaqeysay kahor intaadan codsan dheefaha.
- **Haddii aad ku jirtay militariga** 18-kii bilood ee la soo dhaafay, waxaad u baahan doontaa macluumaadka DD-214-kaaga.
- **Haddii aad ahayd shaqaale federaal** 18-kii bilood ee la soo dhaafay, waxaad u baahan doontaa
  - Foomka 8 (SF8) Caadiga ah, “Ogaysiis ku socda Shaqaalaha Federaalka ee ku saabsan Caymiska Shaqo la'aanta”
  - Foomka Caadiga ah 50 (SF50)
  - Bayaanada Fasaxa iyo Dakhliga
  - Foomkaaga W-2
- **Haddii aad sida caadiga ah shaqadaada ka hesho urur shaqaale oo si buuxda kuu soo gudbiyay**, sheeg magaca iyo lambarka deegaanka ee ururkaaga.

## Sababaha hadda aadan u shaqayn

Markaad dalbato, waxaanu ku waydiin doonaa sababta aanad u shaqayn. Waa muhiim inaad doorato sababta saxda ah ee aad shaqada [uga tagtay](#) . Qaar ka mid ah sababaha caanka ah waxaa ka mid ah:

Sababta	Xaaladaada
Ka tagay	Waxaad samaysay go'aankii ugu dambeeyay ee aad kaga tagtay (uga baxday) shaqadaada.
La cayriyay ama shaqada laga saaray	Waxaa jirta shaqo la heli karo, laakiin loo-shaqeeyahaagu wuxuu kaa saaray ama kaa cayriyay shaqada sababo aan ahayn shaqo la'aan awgood.
Laga saaray ama shaqo aysan jirin	Loo-shaqeeyahaagu shaqo bannaan ma lahayn, shaqadaadiina waa la xiray ama meheraddii aad u shaqaynaysay ayaa la xidhay.
Shaqo joojin	Waxaad tahay shaqo la'aan sababtoo ah waxaad tahay xubinta urur shaqaale, oo waxaad ku jirtaa shaqo joojin.
Waxaad ka soo wareegtay shaqo waqti buuxa oo u wareegtay waqti dhiman	Saacadahaaga waxa laga dhigay wax ka yar saacadahaaga wakhtiga buuxa ee shaqadaada caadiga ah. Xaaladdan oo kale, waxaad heli doontaa mushahar aad soo sheegto toddobaad kasta. Laakiin waxaa laga yaabaa inaad weli u qalanto dheefaha.
Fasaxa maqnaanshaha	Waxaad codsatay fasax maqnaansho, waxaadna ku noqon doontaa shaqada marka uu dhamaado.

## Oonlayn ka codso

Si aad u hesho adeegga ugu dhaqsiiyaha badan, waxaan kugula talineynaa inaad online ka dalbato.

Waxay ugu fiican tahay in la isticmaalo laptop ama kombuyuutar wayn. Foomka oonlaynka si fiican uguma shaqeeyo aaladaha mobilada.

## Furo ciwaankaaga onlaynka ah

Haddii aadan horay u isticmaalin adeegyada oonlaynka ee gobolka Washington, waxaad u baahan tahay inaad furato ciwaanka Helitaanka Amaanka ah ee Washington (SecureAccess Washington) (SAW).

**Muhiim:** Ha furan ciwaan kale haddii aad hore u lahayd. Haysashada wax ka badan hal ciwaan oo SAW ah waxay dib u dhac ku keeni kartaa codsigaaga iyo helitaanka dheefaha.

Si aad u furato ciwaan, booqo [secure.esd.wa.gov](https://secure.esd.wa.gov). U dego qaybta “Need an account (U baahan ciwaan)”.

Markaad furato ciwaankaaga, waxaad u isticmaali kartaa inaad si ammaan ah u maamusho codsigaaga dheefaha, sheegashooyinka toddobaadlaha ah iyo wax kale oo badan.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan abuurista ciwaankaaga SAW, ama haddii aad illowday magaca ama lambarka sirta ah ee ciwaanka jira, booqo bogga taageerada farsamada ee webseedkeena oo ah [esd.wa.gov/ technical-support](https://esd.wa.gov/technical-support).

## Dir codsigaaga

Waxaad ka dalban kartaa onlayn 24 saac maalintii, 7 maalmood usbuucii [secure.esd.wa.gov](https://secure.esd.wa.gov).

1. Gal ciwaankaaga SAW.
2. Raac lifaaqa si aad u codsato dheefaha shaqo la'aanta.
3. Raac tillaabooyinka si aad u buuxiso codsigaaga.
4. Haddii aad bixiso ciwaanka iimaylka, waxaad heli doontaa iimaylka xaqiijinta.

Ka eeg xog dheeraad ah [esd.wa.gov/how-to-apply](https://esd.wa.gov/how-to-apply).

## Taleefanka ka codso

Haddii aad doorbidayso inaad telefoon ku codsato, naga soo wac [800-318-6022](tel:800-318-6022). Haddii aad qabto nafo maqal ama hadal, wac 711 si aad u hesho Washington Relay.

Saacadaha shaqada ee hadda ee Xarunta Dacwadaha, ka eeg boggayaga internetka oo ah [esd.wa.gov/contact](https://esd.wa.gov/contact).

### Muhiim

**Haddii aadan haysan telefoon ama kombiyuutar**, waxaad ku isticmaali kartaa mid bilaash ah xarun kasta oo WorkSource leedahay. Si aad u hesho xarunta kuugu dhow, adeegso raadiyaha WorkSource oo ah [WorkSourceWA.com](https://WorkSourceWA.com).

## Dookhyada gelitaanka mushaarka

Haddii aad xaq u leedahay dheefaha, waxaad lacagta ku heli kartaa:



### Lacag shubis toos ah

Doorashadani waxay si toos ah lacagta u gelinaysaa akoonkaaga jeega.

- Waxaad u baahan tahay bangigaaga ama koontada ururka deynta iyo lambarada ruutinka si aad isu diiwaangeliso. Waxaad ka heli kartaa lambaradan jeegaga waraaqahaaga ama waxaad waydiin kartaa hay'addaada maaliyadeed.
- Waxaad u baahan tahay inaad iska diiwaan geliso onlayn adigoo isticmaalaya eServices si aad u hesho lacag diris toos ah. **Tan kuma samayn karno telefoon ahaan.**



### Kaarka bangiga

Doorashadani waxay ku siinaysaa kaadhka bangiga.

- Waxaan ku darnaa dheefahaaga kaadhka usbuuc kasta oo aad soo gudbiso codsi oo aad xaq u leedahay.
- Waxay u shaqeysaa sida kaararka kale ee bangiga. Wax ayaad ku iibsanaa kartaa, heli kartaa lacag caddaan ah oo aad biilasha ku bixin kartaa.
- Kaarka lacag bangiga kuma xidhna akoonkaaga bangiga.

Haddii aadan dooran lacag shubis toos ah, waxaan kuu soo diri doonaa kaarka lacagta kadib markaad dalbato. Lacag ma gelin doono kaarka ilaa aan ansixino sheegashadaada. Wixii faahfaahin ah, booqo [esd.wa.gov/debit-card-info](http://esd.wa.gov/debit-card-info).

## Kadib marka aad codsato dheefaha

Ka dib markii aan helno codsigaaga, waxaan kuu soo diri doonaa dhowr fariimood. Si joogto ah u hubi boostada Maraykanka inta lagu jiro wakhtigan. Haddii aad leedahay ciwaanka eServices, sidoo kale si joogto ah u hubi. Waxaan kuu soo diri doonaa:

- Go'aaminta Sheegashada Shaqo La'aanta: Tani waxay ku siin doontaa faahfaahin ku saabsan qaddarka toddobaadlaha ah ee laga yaabo inaad xaq u yeelato inaad hesho haddii aanaan wax su'aalo ah ka qabin codsigaaga. Nidaamka eServices, warqadaan waxaa la dhahaa “[go'aaminta lacagta](#).”
- Xuquuqdaada iyo Waajibaadyadaada Dheefaha: Tan waxa ku jiri doona macluumaadka ku saabsan codsigaaga iyo waxa la sameeyo inta aad sugayso in la habeeyo.
- Maxaa Xiga: Warqadani waxay sharxi doontaa waxa la sameeyo kadib markaad gudbiso codsigaaga.

## Haddii aan wax su'aalo ah ka qabno codsigaaga

**Codsiga Macluumaadka:** Waxaa laga yaabaa inaan kula xiriirno adiga ama loo-shaqeeyahaaga si aan u helno macluumaad dheeraad ah. Waxaan:

- Soo diri karnaa su'aalaha anagoo isticmaalaya eServices ama boostada Maraykanka.
- Ku soo wici karnaa ama aan iimeyl kuu dirno si aan u codsado macluumaadka.
- Waxaan la xiriiri karnaa shirkada aad horey ama hadda u shaqeyso.

Waa muhiim inaad si degdeg ah uga jawaabto sababtoo ah waxaan u baahanahay macluumaadkan si aan u go'aamino u-qalmitaankaaga. Haddii aadan ka jawaabin codsiga macluumaadka, waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelan dheefaha.

**Warqadda Go'aaminta:** Kadib markaad ka soo jawaabto codsigayaga macluumaadka oo aanu gaadhnay go'aan aanu ku ogolaanayno ama u diidno dheefaha, waxaanu soo dirnaa warqad go'aan.

**Ogoow:** Adiga ama cidda aad u shaqayso waxaad xaq u leedihiin inaad rafcaan ka qaadataan go'aamadayada haddii aad diidan tahay. Fiiri qaybta racfaanka ee buug-gacmeedkan.

## Shaqo raadi oo gudbi codsiyada toddobaadlaha ah

Biloow shaqo raadintada isla usbuuca aad rabto inaad bilowdo helitaanka dheefaha.

Soo gudbi codsigaaga toddobaadlaha ah ee ugu horreeya Axadda kadib markaad codsato dheefaha, xitaa haddii aad weli naga sugayso jawaab.

Gudbi toddobaad kasta si aad uga fogaato dib u dhac ku yimaada lacagta. Soo gudbin la'aanta inta codsigaaga dib loo eegayo waxay horseedi kartaa dib u dhac ku yimaada ansixinta.

Waxa lagu siin doonaa lacag toddobaadyada aad gudbiso codsi oo aad u qalanto, marka laga reebo toddobaadka sugitaankaaga. Ka akhriso xog badan oo ku saabsan toddobaadka sugitaankaaga qaybta “Gudbi codsi toddobaadle ah” ee buug-gacmeedkan.

## Muhiim


In aan si kale kuu sheegno mooyaane, waa inaad dhammaystirtaa hawlaha shaqo raadinta ee loo baahan yahay toddobaad kasta si aad ugu qalanto dheefaha. Faahfaahin badan ka akhri qaybta “shaqo raadinta” ee buug-gacmeedkan.

## Ballanta adeegyada shaqada

Kadib markaad codsato dheefaha, waxaa laga yaabaa in lagu doorto inaad ka qaybgasho ballanta adeegyada dib u shaqaalaynta. Kani waa kulan aan la yeelanayso mid ka mid ah shaqaalahayaga WorkSource si uu kaaga caawiyo qorshahaaga ku noqoshada shaqada.

Ma aha in qof kasta loo doorto ballantan. Laakiin haddii lagu doorto, waxaad u baahan tahay inaad ka soo qaybgasho. Haddii aad iman waydo, waxa laga yaabaa in lagu diido dheefaha.

## Heeganka

Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto dheefaha shaqo la'aanta haddii loo-shaqeeyahaagu uu si ku-meel-gaar ah shaqada kaaga joojiyo ama u dhimo saacadahaaga. Waxaad u qalmi kartaa [heeganka](#) , ama waxaa laga yaabaa inaan kuu tixgelinno inaad qayb ahaan shaqeyso. Hadday sidaas tahay, maaha inaad ka soo baxdo shuruudaha shaqo raadinta si aad u hesho dheefaha toddobaad kasta.

Employment Security (Amaanka Shaqada) — ma aha loo-shaqeeyahaaga — ayaa oggolaata ama diida dhammaan codsiyada heeganka. Waxaan kuu soo dirnay warqad si aan kuu ogeysiino haddii codsiga la oggolaaday. Sharcigu waxa uu ogol yahay ugu badnaan 8 toddobaad oo heegan ah sannad dheefeed gudahiis.

Waxaanu ogolaanay codsiyada heeganka haddii aad ku jirto mid ama ka badan xaaladahan:

- Waxaad u shaqaysay loo-shaqeeyahaaga 8 -dii toddobaad ee la soo dhaafay. Oo waxaad noo sheegtay inaad ku soo laaban doonto shaqada 4 -ta toddobaad ee soo socda gudahood.
- Waxaad u shaqaysay loo-shaqeeyahaaga 8 -dii toddobaad ee la soo dhaafay. Loo-shaqeeyahaaguna wuxuu noo sheegay in aad shaqada ku soo laaban doonto 8 da toddobaad ee soo socda gudahood. Loo-shaqeeyayaashu waxay u baahan yihiin inay codsadaan heeganka tusaalahan.
- Waxaad filaysaa inaad si buuxda ula shaqeyso loo-shaqeeyaha hore 2 todobaad gudahood, in ka badan 8 toddobaad ayaa ka soo wareegay markii ugu dambaysay ee aad u shaqaynaysay loo-shaqeeyahaas.
- Waxaad filaysaa inaad si buuxda ula shaqeyso loo-shaqeeyaha cusub 2 da toddobaad ee soo socda gudahooda. Taariikhda ku soo laabashada shaqada ama taariikhda bilawga shaqo-bixiyahaaga cusub waa in la bixiyaa oo ay ku jirtaa wakhtiga sugitaanka ee la codsaday.

Faahfaahin dheeraad ah ka eeg [esd.wa.gov/temporary-layoffs-and-furloughs](https://esd.wa.gov/temporary-layoffs-and-furloughs).

## Qadarka dheefaha

Kadib markaad codsato dheefaha, waxaad ku heli doontaa Go'aaminta Sheegashada Shaqo La'aanta ee boostada Maraykanka. Haddii aad doorato adeegyada eServices oo ah habka isgaadhsiinta ee aad door bidayso, waxa kale oo aad ka heli doontaa qaybta Ogeysiisyada/waraaqaha ee ciwaankaaga eServices. Waxaa loogu yeeri doonaa “go'aaminta lacagta.” Warqaddu waxay sharxaysaa:

- Inta ay le'eg tahay dheefaha aad xaq u yeelan karto inaad hesho haddii sheegashadaada la oggolaado.
- Sida aan u xisaabinay lacagtaas.

- Macluumaadka ku saabsan sida loo xareeyo rafcaan ama loo codsado dib-u-go'aamin haddii aadan nagu raacsanayn go'aankayaga.

Ka akhri xog badan websaydka ESD oo ku saabsan sida aan u xisaabinno qaddarka dheefahaaga. Booqo [esd.wa.gov/calculate-your-benefit](http://esd.wa.gov/calculate-your-benefit). Kadibna raadi lifaaqa “Estimate your benefit (Qiyaas dheeftaada).”

## Lacagaha la jaro

Waxaan mararka qaarkood u baahanahay inaan dhinno dheefahaaga toddobaadlaha ah. Waa kuwan qaar ka mid ah sababaha.


### Lacagta aad heshay

Haddii aad shaqaynayso wakhti dhiman, waxa laga yaabaa inaad weli u qalanto dheefaha. Hubi inaad kaga warbixiso dakhliga kaa soo gala shaqada waqti-dhiman sheegashadaada toddobaadlaha ah. Waxa laga yaabaa in aan wax ka beddelno qaddarka dheefahaaga toddobaadlaha annaga oo ka jarayna qayb ka mid ah dakhligaaga. Markaad soo sheegto dhammaan dakhliga ku soo gala, waxaad iska ilaalinaysaa inaad dib u bixiso dheefaha hadhow.

Waa inaad soo sheegtaa dakhliga kusoo gala toddobaad kasta oo aad shaqeyso, xitaa haddii aan weli lagu siin. Ka eeg qaybta “Dakhli soo sheeg” ee buug-gacmeedkan wixii macluumaad dheeraad ah.

### Lacagta lagugu leeyahay

Qaar ama dhammaan dheefaha waa la dhimi karaa haddii:

- Lagugu leeyahay taageerada ilmaha ee maxkamadu amartay.
- Lagugu leeyahay lacag kasta oo lagaaga jaray macaashka canshuurta dakhliga oo loo diray Internal Revenue Service (Adeegga Dakhliga Gudaha, IRS).
- Aad hore u heshay dheefaha shaqo la'aanta oo aanad xaq u lahayn, oo aanad dib u bixin lacagihii [dheeraadka ahaa](#), . Tan waxa ku jira cadad kasta oo loo hayo cashuurta.

## Canshuuraha

Dheeftaada waxaa cashuurta dawlada dhexe. Gobolka Washington ma laha canshuurta dakhliga gobolka. Haddii aad ku nooshahay gobol kale waxaa laga yaabaa inaad mas'uul ka tahay canshuurta dakhliga ee gobolkaas.

Waxaad dooran kartaa in 10% lacagtaada laga jaro dheefahaaga toddobaadlaha ah si loogu adeegsado cashuurta dakhliga. Haddii aad doorato inaan cashuurta lagaa reebin, waxaad masuul ka noqon doontaa cadadka la cashuurayo dhamaadka sanadka. Ma soo celin karno canshuur kasta oo aan reebnay.

Haddii aad leedahay koontada eServices, waxaad cusboonaysiin kartaa doorashada haynta cashuurta wakhti kasta. Gal ciwaankaaga oo dooro dookha “Beddel dookhyada haynta canshuurta federaalka”.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan cashuuraha dheefaha, kala xidhiidh Adeegga Dakhliga Gudaha Internal Revenue Service (Adeegga Dakhliga Gudaha, IRS) barta [irs.gov](http://irs.gov) ama la hadal xirfadlahaaga cashuuraha.

Dhamaadka Janaayo sannad kasta, Employment Security wuxuu ku siin doonaa foomka IRS 1099-G. Tani waxay tusinaysaa cadadka dheefaha lagu siiyay iyo wixii cashuur dakhli ah ee lagaa jaray. Haddii aadan helin foomkaaga 1099-G, waxaad mid ku codsan kartaa:

- Inaad gasho eServices kadibna doorato batoonka foomamka 1099.
- Iimeyl u diraya [UI1099@esd.wa.gov](mailto:UI1099@esd.wa.gov).


- Ka wacaaya Unemployment Claims Center (Xarunta Codsiyada Dheefaha Shaqo La'aanta) lambarka [800-318-6022](tel:800-318-6022).
  - Haddii aad qabto naafo maqal ama hadal, wac 711 si aad u hesho Washington Relay.

Booqo [esd.wa.gov/income-taxes](http://esd.wa.gov/income-taxes) si aad wax badan uga ogaato ku bixinta cashuurta dakhliga ee dheefaha.

## Dakhliga hawlgabka

Haddii aad lacag ka hesho qorshaha hawlgabka ee loo-shaqeeyahaagu ama ururka shaqaaluhu ay wax ku biiriyeen, qayb ka mid ah lacagtaas waxa laga yaabaa inay dhimayso dheefahaaga.

Waa inaad noo sheegtaa haddii aad hesho, ama aad codsato inaad ka hesho, lacag-bixinaha billaha ah qorshahaaga hawlgabka. Haddii aanad qorshaha wax lacag ah ka helin, markaa wax saamayn ah kuma yeelanayso qaddarka dheeftaada.

Lacagaha Social Security ama dheefaha badbaadaha, oo ay ku jiraan lacagaha naafada ee Social Security, looma baahna in la soo sheego mana saameynayso [weekly benefit amount \(qaddarka dheefta toddobaadlaha ah, WBA\)](#) .

## Lacagaha kala taga

Xirmada shaqo ka saarista ama lacagahaan laga helo loo-shaqeeyahaagu waxay saamayn kartaa qaddarka dheefahaaga shaqo la'aanta:

- Lacagta lagu baxshay ogeysiiska beddelka
  - Haddii shaqadaada la joojiyo ogeysiis la'aan, loo-shaqeeyahaagu wuxuu ku siin karaa lacagtii aad kasban lahayd muddada ogeysiiska.
- Gunnada shaqo ka joojinta
  - Haddii aad lacag qaadato muddo kadib maalinta ugu dambeysa ee shaqada, oo loo-shaqeeyahaagu uu kaa rabo inaad wicitaan u furnaato muddadaas iyo haddii lacag-bixintu ay joogsato haddii aad shaqo cusub hesho.
- Gunnada shaqo ka cayrinta
  - Kani waa lacag laga yaabo inaad ku hesho qayb ka mid ah joojinta shaqadaada, taasoo ku xidhan shaqada la qabtay kahor ka cayrinta.

Waxaad u baahan tahay inaad ka warbixiso wixii lacag ah ee gunnada shaqo ka cayrinta ah markaad xerayso codsigaaga toddobaadlaha ah. Waxaa laga yaabaa inaan kula soo xiriirno si aan u helno macluumaad dheeri ah si aan u go'aamino haddii lacagta shaqo ka cayrinta laga jari karo dheefahaaga toddobaadlaha ah.

## Soo gudbi codsigaaga toddobaadlaha ah

Usbuuc kasta oo aad codsato dheefaha, waa in aad awood u leedahay oo aad diyaar u tahay shaqo oo aad dhamaystirto 3-da hawlood ee soo socda si aad xaq ugu yeelato:

- Shaqo raadiso haddaanaan si kale kuu sheegin.
- Soo gudbis codsigaaga toddobaadlaha ah.
- Soo sheegto lacagaha aad heshay. Ka warbixi wixii lacag ah ee aad kasbatay usbuuca aad codsanayso, xataa haddii aan weli lacag lagu siin.

Haddii aad ku guul daraysato inaad dhamaystirto mid ka mid ah hawlahaan, waxaa laga yaabaa inaad u qalmin dheefaha usbuuca.

# Shaqo raadi

Ilaa in aan si kale kuu sheegno mooyaane, waxaa laga raba inaad si firfircoon u raadiso shaqo kugu habboon toddobaad kasta oo aad rabto inaad hesho dheefaha. Waxaad u baahan tahay inaad dhammaystirto ugu yaraan 3 hawlo shaqo raadin ah oo la ansixiyay. Waa kuwan tusaalayaasha waxa u qalma iyo waxa aan u qalmin.

Hawlaha Shaqo Raadinta ee u-qalma	Hawlaha Shaqo Raadinta ee aan u Qalmin
Codso shaqo ku habboon xirfadahaaga iyo shahaadooyinkaaga.	Codsashada shaqo aanad u qalmin.
Wareysi shaqo.	Daawashada shaqooyinka banaan adigoo codsan.
Tag hoolka shaqaaleysiinta ururka ama ka mid noqo liiska dadka shaqo la'aanta ah ee ururka si aad u hesho gudbin buuxda, haddii aad xubin ka tahay ururkaas.	Inaad shaqo u codsan habkii uu faray loo-shaqeeyaha (tusaale, ku guul daraystay in aad soo gudbiso arjiga onlaynka ah marka loo-shaqeeyahaagu kuu sheego inaad oonlayn ka codsato).
Ka qayb qaado adeegyada dib u shaqaalaynta ee xarunta WorkSource ee deegaankaaga.	

Si aad u hesho dhammaan hawlaha shaqo raadinta ee la ansixiyey, booqo [esd.wa.gov/eligibility](https://esd.wa.gov/eligibility), kadibna dooro “Job search requirements (shuruudaha shaqo raadinta).”

## Hayso diiwaanka shaqo raadinta

Waxaad u baahan tahay inaad diiwaangeliso dhammaan hawlaha shaqo raadinta. Waxaa laga yaabaa inaan ku waydiino inaad keento diiwaanka shaqo raadintaada. Fiiri Lifaqa C si aad u hesho tusaalaha diiwaanka shaqo raadinta.

Hayso diiwaanka shaqo raadinta ugu yaraan 30 maalmood kadib dhamaadka [sanadkaaga dheefaha](#) ama marka aad hesho lacagtaadii ugu dambaysay ee [kordhinta dheefaha](#), hadba kii danbeeya.

## Soo gudbiso codsigaaga toddobaadlaha ah

Si aad u hesho dheefahaaga toddobaadlaha ah, waxaad u baahan tahay inaad xerayso codsi toddobaadle ah. Markaad xerayso codsigaaga, waxaanu ku waydiin doonaa su'aalo taxane ah. Su'aalahaani waxay naga caawinayaan inaan go'aan ka gaarno haddii aad xaq u leedahay inaad dheefo hesho toddobaadkaas. Tusaale ahaan, waxaan ku weydiin doonaa haddii aad:

- Haddii aad awoodday oo aad diyaar u ahayd inaad aqbasho shaqada.
- Aad dhamaystirtay hawlaha shaqo raadinta ee la ansixiyay.
- Aad diiday wax shaqo ah ama yabooh ah.
- Aad shaqeysay saacado kasta, iyo haddii ay sidaas tahay, Cadadka lacagta aad kasbatay.
- Aad heshay fasax, dalxiis ama mushaharka xanuunka wakhti kasta inta lagu jiro usbuuca, iyo haddii ay sidaas tahay, cadadka lacag ah ee lagu siin doono.

## Sababaha dheefaha loo diidi karo

Waxaa laga yaabaa inaan diidno dheefahaaga haddii aad ka warbixiso macluumaad aan run ahayn ama aan sax ahayn (mid ula kac ah ama aan ula kac ahayn) sida taariikhda shaqada, sababaha lagaaga saaray shaqada, dakhliga (shaqo la daboolay ama aan la daboolin), hawlaha shaqo raadinta ama aadan awoodin ama diyaar u ahayn inaad shaqeyso.

## Marka aad soo gudbinayso codsigaaga toddobaadlaha ah

Toddobaadyada codsigu waxay bilaabmayaan Axadda waxayna dhammaanayaan Sabtida. Axada kadib marka ugu horeysa ee aad codsato dheefaha waa maalinta ugu horeysa ee aad xereyn karto codsi todobaadle ah.

Had iyo jeer xareysa codsigaaga usbuuca dhamaaday. Wakhtiyada aad gudbin karto waa:

- Oonlaynka: Axada, 12:01 a.m. – Sabtida, 11:59 p.m.
- Taleefanka: Axada, 12:01 a.m. – Jimcada, 4 p.m.

Tusaale:

### Asbuuca 1


- Buuxi shuruudaha shaqo raadinta.

### Asbuuca 2

- Soo gudbi codsigaaga toddobaadlaha ah ee asbuuca 1.
- Buuxi shuruudaha shaqo raadinta ee asbuuca 2.

### Asbuuca 3

- Soo gudbi codsigaaga toddobaadlaha ah ee asbuuca 2.
- Buuxi shuruudaha shaqo raadinta ee asbuuca 3.



## Sii wad inaad xarayso codsigaaga toddobaadlaha ah

Waa inaad gudbisaa codsi toddobaad kasta oo aad doonayso inaad hesho dheefaha, xataa haddii:

- Aad sugayso inaad ogaato inaad u qalanto dheefaha iyo in kale.
- Aad shaqaysay waqti dhiman inta lagu jiro usbuuca sheegashadaada.
- Laguu diiday dheefaha oo aad gudbisay rafcaan.

Haddii aadan xareyn codsi toddobaadle ah, ma heli kartid dheefaha usbuucaas.

## Toddobaadka sugitaanka

Toddobaadka ugu horreeya ee aad xaq u leedahay dheefaha waa toddobaadka sugitaankaaga. Wax lacag ah laguma siin doono toddobaadkaan. Waa inaad weli buuxisaa dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka inta lagu jiro toddobaadkan oo aad gudbiso codsi toddobaadle ah.

Fiiro gaar ah: Waxa jira hal usbuuc oo keliya oo sugitaan ah inta lagu jiro [sannad dheefeedka](#). Haddii aad joojiso xereynta toddobaad kasta oo aad dib u bilowdo codsigaaga isla sanadka dheefaha, ma heli doontid toddobaad kale oo sugid ah.

### Tusaale

#### Asbuuca 1 (Asbuuca sugitaanka)


- John wuxuu waayay shaqadiisa wuxuuna dalbaday dheefo.
- Waxa uu bilaabay dhaqdhaqaaqiisa shaqo raadinta.
- Kani waa usbuuciisa sugitaanka.

#### Asbuuca 2

- John wuxuu xereeyaa codsiyiisa toddobaadlaha ah ee toddobaadka 1. Maadaama toddobaadka 1 uu yahay toddobaadka sugitaanka John, ma heli doono lacag.

#### Asbuuca 3

- John wuxuu xereeyaa codsiyiisa toddobaadlaha ah ee toddobaadka 2.
- Haddii uu buuxiyay dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka ee toddobaadka 2, John wuxuu heli doonaa lacag-bixintiisii ugu horreysay.



## Qaababka loo soo gudbiyo codsigaaga toddobaadlaha ah



### Oonlaynka

Adeegga ugu dhakhsaha badan, isticmaal akoonkaaga SAW si aad u gasho [secure.esd.wa.gov](https://secure.esd.wa.gov).

Doorashadan waxa la heli karaa 24 saac maalintii/7 maalmood toddobaadkii.

Haddii ay dhibaato kaa haysato gelidda, wac [855-682-0785](tel:855-682-0785) si lagu caawiyo.



### Taleefanka

Wac [800-318-6022](tel:800-318-6022) si aad codsi u gudbiso.

- Istimaal nidaamka telefoonka ee otomaatiga ah. Waxaa la heli karaa laga bilaabo 12:01 a.m. Axada ilaa 4 p.m. Jimcada.
- La hadal wakiilka sheegashooyinka. Saacadaha shaqada ee Claims Center (Xarunta Codsiyada) ee hadda, fadlan ka eeg boggayaga internetka oo ah [esd.wa.gov/contact](https://esd.wa.gov/contact).

# Soo sheeg lacagaha aad heshay.

Waxaan wax ka badelnaa qaddarka dheefahaaga toddobaadlaha annaga oo ka jarayna qayb ka mid ah dakhligaaga. Markaad soo sheegto dhammaan dakhliga ku soo gala, waxaad iska ilaalinaysaa inaad dib u bixiso dheefaha hadhow. Mararka qaarkood dheefahaaga shaqo la'aanta waa la dhimaa ama la diidaa sababtoo ah dakhliga aad uga warbixisay sheegashadaada toddobaadlaha ah. Tani waxay dhici kartaa haddii:

- Aad shaqeysay oo aad heshay lacag usbuuca dhexdiisa, iyo
- Dakhligaagu uu ahaa mid aad u sarreeya si aad u hesho dheefo buuxa ama qayb.

Xaaladahan, kuma heli doontid go'aan qoran oo gooni ah boostada. Tan waxaa lagu ogol yahay sharciga gobolka (WAC 192-140-200). Inkasta oo aanan soo dirin warqad rasmi ah, haddana waxaa loo tixgeliyaa diidmo ama dhimista dheefahaaga usbuuca.

Haddii aad aaminsan tahay in codsigaaga loo diiday ama si khaldan loo dhimay, wac xarunta sheegashada [800-318-6022](tel:800-318-6022).

Waxaad ka heli kartaa shaxda dhimista dakhligii ugu dambeeyay: [esd.wa.gov/media/pdf/1046/esd-earnings-deduction-chart.pdf](https://esd.wa.gov/media/pdf/1046/esd-earnings-deduction-chart.pdf).

Isticmaal dakhligaaga guud (kahor intaan wax la jarin) markaad bixinayso macluumaadkan.



## Marka aad soo sheegayso lacagaha aad heshay

Soo sheeg dakhliga ku soo gala usbuuc kasta marka aad xeraynayso codsigaaga usbuucii hore, xataa haddii aan wali lacag lagu siin.



## Lacagaha aad soo sheegayso

- Dakhliga shaqada caadiga ah.
- Dakhliga xaasilka ah ee ka soo gala ganacsigaaga (iskaa u shaqeysiga).
- Lacagaha nooc kasta. Tusaale: haddii loo-shaqeeyahaagu ku siiyo qol iyo boodh qayb ka mid ah lacagtaada.
- Gunnooyinka shaqada toddobaadkaas.
- Wixii dakhli ah ee kaa soo gala shaqada ku salaysan komishanka.
- Abaal marinada nooc kasta.
- Fasax mushaar leh, dalxiis ama fasax jirro, ilaa in ay tahay lacag caddaan ah oo ka baxsan fasax aan la isticmaalin maahee.
- Mushaharka Kaydka Milateriga/Ilaallada Qaranka, haddii aad shaqeysay in ka badan 72 saacadood oo xiriir ah.
- Kharashka xeerbeegta ama dakhliga kaa soo galay shaqada waxbarashada ee gobolka.
- Wixii dakhli ah ee ka soo gala shaqada caadiga ah ama shaqada maalinlaha ah.



## Sida loo xisaabiyo dakhliga guud

- Tirada saacadaha la shaqeeyay toddobaadka x heerka mushaharka = dakhliga guud.
- Tusaale ahaan, haddii aad shaqeysay 30 saacadood toddobaadkii oo lagu siiyo \$20 saacaddii, waxaad soo sheegi doontaa \$600 dakhliga guud ee usbuuca ah (30 saacadood x \$20 saacaddii).

## Muhiim

Haddii aad shaqaynayso markaad codsanayso dheefaha, waxaad weli u baahan tahay inaad dhammaystirto 3 hawlood oo shaqo raadin ah oo la ansixiyay toddobaad kasta oo aad xerayso codsi.

## Ku soo noqoshada shaqada

WorkSource waxay bixisaa barnaamijyo iyo adeegyo bilaash ah — oo ay ku jiraan raadinta shaqada iyo ilaha shaqada — si ay kaaga caawiyaan inaad si dhakhso leh shaqo u hesho.

### Shuruudaha shaqo raadinta

Haddii aad ku nooshahay Washington, waxaad u baahan tahay inaad akoon ka samaysato WorkSourceWA.com system. Si aad taageero ugu hesho tan, booqo bogga [WorkSourceWA.com](http://WorkSourceWA.com) si aad u hesho xarunta WorkSource ee kuugu dhow. Haddii aad ku nooshahay meel ka baxsan Washington, waxaad u baahan tahay inaad iska diiwaangeliso xarunta shaqada ee degaankaaga.

## Adeegyada dib u shaqaalaynta

### Xarumaha WorkSource

Kaalmada shaqo raadinta oo ay weheliso WorkSource waxay kaa caawin kartaa dib u helista shaqada, xirfadaha waraysiga, macluumaadka suuqa shaqada iyo wax kale oo badan.

WorkSource waxa kale oo ay kaa caawin kartaa in ay kugu xidho aqoon-is-weydaarsiyada iyo munaasabaha shaqaaleysiinta ee aaggaaga, ku siiso xidhiidhinta guddiyada shaqada iyo helitaanka ilaha tababarka ee gobolka oo dhan.

Xarunta WorkSource ee degaankaaga ayaa laga yaabaa inay sidoo kale bixiso barnaamijyo tababar. Weydii xarunta degaankaaga.

Booqo [WorkSourceWA.com](http://WorkSourceWA.com) si aad u hesho faahfaahinta adeegyada goob kasta.

### Adeegyo dheeraad kuu ah

#### Barnaamijyada tababarka

Waxaad iska qori kartaa tababar ama barnaamij waxbarasho oo waxaad sii wadi kartaa inaad hesho dheefaha shaqo la'aanta, ilaa iyo inta aad xaq u leedahay dheefaha toddobaad kasta. Barnaamijyada tababarka ee la tixgeliyay waxaa ka mid ah:

- Commissioner Approved Training (Tababarka uu Oggolaaday Gudoomiyuhu, CAT): Waxay meesha ka saartaa shuruudaha shaqo raadinta inta lagu jiro tababar ama barnaamij waxbarasho oo la ansixiyay.
- Training Benefits (Dheefaha Tababarka, TB): Wuxuu ku siinayaa toddobaadyo dheeraad ah oo dheefaha shaqo la'aanta ah markaad ku jirto tababar ama barnaamij waxbarasho oo la aqbali karo.
- Self-Employment Assistance Program (Barnaamijka Kaalmada Iskaa u Shaqeysiga, SEAP): Wuxuu bixiyaa tababar iskaa-u-shaqeysiga iyo la-talin ganacsi ah inta aad qaadanayso dheefaha shaqo la'aanta.

Mid kasta oo ka mid ah barnaamijyadan waxay u baahan yihiin oggolaanshaha hore ee Employment Security oo qaarkoodna waxay leeyihiin waqti kama dambays ah. Tusaale ahaan, waxaad haysataa 90 maalmood kadib codsashada dheefaha si aad u codsato dheefaha Tababbarka iyo 120 maalmood si aad isugu diwaangeliso barnaamijka tababarka ee xaqa u leh.

Waxaan kugula talineynaa inaad la shaqeyso bixiyaha waxbarashada ama WorkSource si ay kaaga caawiyaan buuxinta codsiga barnaamijyadan.

Booqo [esd.wa.gov/jobs-and-training/job-training-support](https://esd.wa.gov/jobs-and-training/job-training-support) si aad wax badan uga ogaato barnaamijyada jira iyo haddii aad u qalanto.

### **Tababarada shaqada ee diiwaan gashan**

Haddii aad ku jirto barnaamij tababar shaqo oo diiwaan gashan, dheefaha waxaa laga yaabaa in la heli karo marka aad qaadanyso tababarka fasalka oo aanad ka helin mushahar loo shaqeyyaha.

Faahfaahin dheeraad ah eeg: [esd.wa.gov/apprentice](https://esd.wa.gov/apprentice).

### **Caawimaada hawlgabka ciidanka**

Waxaan haynaa barnaamijyo shaqo oo si gaar ah loogu talagalay halyeeyada ciidanka ama xaaska ciidanka. Haddii aad tahay halyeey ciidan ama xaaskiisa, waxaad ka bilaabi kartaa halkan [esd.wa.gov/jobs-and-training/find-job](https://esd.wa.gov/jobs-and-training/find-job), kadibna dooro “Services for veterans and military spouses (Adeegyada loogu talagalay halyeeyada iyo lamaanaha milatariga).”

### **Shaqaaale xilliyeedka soogalootiga ah**

Booqo [esd.wa.gov/jobs-and-training/farmworker-services](https://esd.wa.gov/jobs-and-training/farmworker-services) si aad u hesho adeegyo loogu talagalay shaqaalaha beeraha.


### **Caymis caafimaad oo bilaash ah ama jaban**

Marka aad tahay shaqaale shaqo la'aan ahaan, adiga iyo qoyskaaga waxaad u qalmi kartaan caymis caafimaad oo bilaash ah ama qiimo jaban. Si aad u aragto haddii aad u qalanto ama sida loo codsado, booqo [wahealthplanfinder.org](https://wahealthplanfinder.org).


## **Marka aad hesho shaqo cusub**

---

### **Shaqo wakhti buuxa**

Markaad ku soo noqoto [shaqada waqti-buuxa ah](#) , uma baahnid inaad noo sheegto inaad shaqo cusub hayso. Kaliya jooji soo gudbinta sheegashooyinkaaga toddobaadlaha ah marka aad bilowdo shaqadaada cusub, xitaa haddii aan lagu siin doonin lacag toddobaad ama ka badan kadib. Haddii aad dheefaha codsato kadib marka aad shaqo bilowdo, waa in aad ka warbixisaa dakhliga ku soo gala xitaa haddii aan weli lagu siin.

### **Heeganka**

Haddii aad shaqo waqti-buuxa ah oo cusub ka hesho loo-shaqeeye cusub oo taariikhda bilawga aad filayso ay tahay 2 toddobaad gudahood, waxaad codsan kartaa in lagu gasho [heegan](#) . Haddi aan ansixino heeganka, waxa laga yaabaa in lagu siiyo lacag adoon dhamaystirin hawlaha shaqo raadinta. Waxaad ka codsan kartaa heegan adoo adeegsanaya eServices ama adoo wacaya oo la hadlaya wakiilka sheegashooyinka.

Haddii aan diidno codsigaaga ah in heegan lagu geliyo, ma joojin doonto dheefahaaga. Heeganku waxa uu kaliya dhaafaa shuruudaha shaqo raadinta si aad xaq ugu sii lahaato dheefaha.

Waa inaad sii waddaa hawlaha shaqo raadinta ilaa aad ka hesho warqad oggolaanaysa heeganka.

Faahfaahin dheeraad ah, ka eeg [esd.wa.gov/temporary-layoffs-and-furloughs](https://esd.wa.gov/temporary-layoffs-and-furloughs).

## Shaqada nus wakhtiga ah

Haddii aad hesho shaqo waqti-dhiman ah, waxa laga yaabaa inaad weli u qalanto lacagaha dheefta qayb ahaan. Hubi inaad ka warbixiso dakhliga kaa soo gala shaqada waqti-dhiman. Ka eeg qaybta “Dakhli soo sheeg” ee buug-gacmeedkan wixii macluumaad dheeraad ah.

## Dib u bilaabidda codsigaaga

Tan waa la yiraahdaa “reopening your claim (dib u furista codsigaaga).” Haddii aad mar kale noqoto shaqo la'aan ama saacadahaaga la dhimo, waxaad dib u bilaabi kartaa sheegashadaada haddii:

- Aanad dhammaan dheefaha isticmaalin sannadka dheefaha ee hadda.
- Aanad xerayn codsi 5 asbuuc ama ka badan oo isku xigta.

## Goorta aad dib u bilaabayso sheegashadaada

Waa in aad dib u bilawdaa isla marka aanad shaqaynayn, saacadahaaga la dhimay, ama aad rabto in aad mar kale bilawdo dheefaha.

Haddii aad seegtay wax ka yar 5 toddobaad oo isku xigta uma baahnid inaad dib u bilowdo sheegashadaada. Xaaladdan oo kale waxaad awoodi doontaa inaad bilowdo xeraynta codsigaaga toddobaadlaha isla markaaba.

## Sida dib loogu bilaabo sheegashadaada

Waxaad dib ugu bilaabi kartaa sheegashadaada mid ka mid ah siyaabaha soo socda:

### Oonlaynka

1. Booqo [security.esd.wa.gov](http://security.esd.wa.gov) oo gal akoonkaaga SAW.
2. Dooro “Apply for unemployment benefits or manage your current and past claims (Codso dheefaha shaqo la'aanta ama maamul sheegashadaada hadda iyo tan hore).”
3. Dooro “Manage my active claim (Maamul sheegashadayda furan).”
4. Dooro “Restart my claim (Dib u bilowdo sheegashadayda)” si aad u bilowdo xeraynta mar kale.

Haddii aad qorshaynayso inaad xarayso wax ka badan usbuuca hadda, waa muhiim inaad si habaysan u xareyso. Ka bilow toddobaadka ugu fog.

### Nidaamka telefoonka ee otomaatiga ah

1. Ka wac nidaamka taleefoonka otomaatiga ah [800-318-6022](tel:800-318-6022) laga bilaabo 12 a.m. Axada ilaa 4 p.m. Jimcada, ilaa in Jimcadu tahay maahee maalin fasax.
2. Dooro ikhtiyaarka “reopen (dib u fur)” sheegashadaada. Dib u fur waxay la mid tahay dib u bilaabistu.

Haddii aad qabto naafo maqal ama hadal, wac 711 si aad u hesho Washington Relay.

## La hadal wakiilka sheegashooyinka

Isticmaal doorashadan haddii aad rabto:

- Inaad codsi u gudbis qaar, laakiin maaha mid kasta, usbuuca la seegay.
- Soo xarayso sheegashooyinka toddobaadyadii la soo dhaafay oo aadan ka geli karin eServices ama nidaamka taleefoonka otomaatiga ah.

Wac [800-318-6022](tel:800-318-6022). Saacadaha shaqada ee hadda ee Xarunta Dacwadaha, fadlan ka eeg boggayaga internetka oo ah [esd.wa.gov/contact](http://esd.wa.gov/contact).

Haddii aad qabto naafo maqal ama hadal, wac 711 si aad u hesho Washington Relay.

### Muhiim

Haddii aad rabto inaad dalbato toddobaadyadii la soo dhaafay oo aad seegtay, ma isticmaali kartid adeegga taleefanka ee otomaatiga ah. Waxaad u baahan tahay inaad si toos ah ula hadasho wakiilka sheegashooyinka ama isticmaal ciwaankaaga eServices.


Haddii aadan ku arkin toddobaadyada aad rabto inaad ka dalbato akoonkaaga eServices, waa inaad si toos ah u wacdaa wakiilka.

## Kadib markaad dib u bilawdo dacwadaada

Kadib markaad dib u bilawdo codsigaaga, waa inaad sidoo kale xeraysataa codsigaaga todobaadlaha ah oo aad buuxisaa dhammaan shuruudaha u-qalmiintaanka usbuuc kasta oo aad rabto inaad hesho dheefaha.

Booqo [esd.wa.gov/restart-your-claim](http://esd.wa.gov/restart-your-claim) si aad u hesho xog dheeraad ah.

## Xuquuqda racfaanka

Haddii adiga ama loo-shaqeeyahaagu aad ku khilaftaan go'aanka, mid kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu [racfaan qaato](#) . Rafcaannada waa in lagu soo gudbiyaa 30 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda warqadda go'aaminta la soo diray.

Haddii aad ku soo diri weydo waqtigii loogu talagalay, waxaa lagu weydiin doonaa inaad sharaxdo sababta aad u daahday, waxayna saameyn kartaa natiijada racfaankaaga.

Booqo [esd.wa.gov/appeal-info](http://esd.wa.gov/appeal-info) si aad u akhrido faahfaahin ku saabsan racfaan ka qaadashada go'aanka.

## Sida loo gudbiyo racfaan



### Oonlaynka

Booqo [secure.esd.wa.gov](http://secure.esd.wa.gov) oo ku soo gal akoonkaaga SAW.

1. Dooro qaybta “Active UI Claim (Codsigaaga UI ee Furan)” ama “Expired UI Claim (Codsiga UI ee Dhacay)” shaashada koobaad.
2. Dooro batoonka “Decision Status (Marxaladda Go'aanka)” si aad u hesho go'aanka aad rabto inaad racfaan ka qaadato.

3. Godka “Action (Talaabada)”, waxaad ka dooran kartaa “File an appeal (Gudbi racfaan).”
4. Raac tilmaamaha si aad u xarayso racfaankaaga.

Waxaad ku xaraysan kartaa racfaan oonlaynka kahor wakhtiga kama dambaysta ah warqadda go'aaminta. Kadib wakhtiga kama dambaysta ah, waxaad u baahan tahay inaad ku xerayso rafcaan boostada ama faakiska.



## Boostada

Racfaankaaga ku dir boostada:  
Claims Center Appeals  
P.O. Box 19018  
Olympia, WA 98507-0018



## Fakiska

Fakis ugu dir racfaankaaga lambarka [800-301-1795](tel:800-301-1795).  
Waxaad ka heli kartaa bilaash kombuyuutar ama fakis xarunta WorkSource ee degaankaaga. Booqo [WorkSourceWA.com](http://WorkSourceWA.com), oo isticmaal raadiyaha goobta WorkSource.

## Macluumaadka aad ugu baahan tahay racfaankaaga

Haddii aad ku buuxiso rafcaankaaga onlayn adiga oo isticmaalaya koontadaada eServices, nidaamku wuxuu kugu dhiirigelin doonaa inaad soo gudbiso dhammaan macluumaadka loo baahan yahay.

Haddii aad ku soo gudbiso racfaankaaga boostada ama fakis, waa inaad ku dartaa macluumaadka soo socda:

- Magacaaga.
- Lambarkaaga Social Security ama Aqoonsig Sheegashada.
- Go'aanka aad racfaanka ka qaadanayso.
- Aqoonsiga Warqadda ee ku qoran warqadda go'aanka ee aad heshay.
- Taariikhda warqadda go'aanka ee aad racfaan ka qaadanayso.
- Sababta u diidan tahay go'aanka.
- Nuqullada diiwaannada ama dukumentiyada aad u malaynayso inaan ku tixgelinno racfaankaaga.
- Magacyada marqaatiyada aad jeclaan lahayd inaad keento dhageysigaaga.
- Haddii aad u baahan tahay turjumaan, noo sheeg luuqadda aad isticmaasho. Tan waxaa ku jira Luuqadda Naafada Ameerika.
- Haddii racfaankaagu daahay, sharax sababta ay u daahday.
- Saxiixaaga.

## Diyaari dukumeentiyada racfaanka


Kahor intaadan ku darin dukumeentiyada racfaankaaga:

- Ka saar wixii macluumaad shakhsi ah oo aan khusayn racfaankaaga, oo ay ku jiraan:
  - Koontada bangiga iyo lambarrada diiwaanka caafimaadka.
  - Cinwaanada, taariikhda dhalashada iyo lambarada Social Security ee dadka kale.
- Hubi in dukumentigaaga uusan ku xirnayn baasweer ama haddii kale aan la geli karin.
- Haddii laguugu soo diro boosto ama fakis, ku dar magacaaga oo buuxa iyo Aqoonsiga Sheegashada ama lambarka Social Security bog kasta.

# Kadib markaad xareyso racfaan

---

Waxaan dib u eegi doonaa racfaankaaga marka aan helno. Haddii aan u baahan nahay macluumaad dheeraad ah, waan kula soo xiriiri doonaa. Mararka qaarkood macluumaadka cusub ee aad bixiso ayaa bedeli kara go'aanka. Haddii ay tani dhacdo, qoraal ayaan kugu wargelin doonaa.

Haddii aanaan xallin kari weyno rafcaankaaga, waxaanu u diri doonaa Office of Administrative Hearings, (Xafiiska Dhageysiyada Maamulka, OAH). OAH waxay boostada kuugu soo diri doontaa Ogeysiis Dhageysi ciwaanka aan ku hayno galkaaga. Ogeysiiska ayaa sharxi doona tillaabooyinka xiga ee dhageysiga [racfaanka](#) . Haddii ciwaankaagu isbeddelo, hubi inaad cusboonaysiiso OAH iyo Employment Security labadaba.

Waxaad u baahan tahay inaad ka qayb qaadato dhageysigaaga si aad u ilaaliso xuquuqdaada dheefta. Sarkaalka dhageysiga eex la'aanta ah ayaa mas'uul ka ah dhageysiga racfaanka.

Waxaad faahfaahin dheeraad ah ka heli kartaa [oah.wa.gov](http://oah.wa.gov).

## Dhageysiga kadib

Sarkaalka dhageysiga ayaa soo saari doona go'aan qoraal ah oo la yiraahdo Amarka Hore. Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka hore, racfaan ayaad ka qaadan kartaa. Waxaad ku arki doontaa tilmaamaha racfaanka Amarka hore.

Employment Security waxa kale oo uu heli doonaa koobiga Amarka Hore oo waxa uu ku cusboonaysiin doonaa codsigaaga go'aanka.

## Helitaanka kaalmo sharci

Waxaad qabsan kartaa qareen kaa caawiya racfaankaaga haddii loo baahdo. Haddii aadan awoodin qareen, waxaa laga yaabaa inaad hesho caawimaad sharci oo bilaash ah ama qiimo jaban. Khayraadka waxaa ku jira:

- Office of Civil Legal Aid (Xafiiska Kaalmada Sharciga Madaniga ah) oonlaynka barta [ocla.wa.gov](http://ocla.wa.gov).
- [UnemploymentLawProject.org](http://UnemploymentLawProject.org) ama ka wac [888-441-9178](tel:888-441-9178).
- CLEAR (Qayb ka ah Northwest Justice Project) - [nwjustice.org/get-legal-help](http://nwjustice.org/get-legal-help) ama wac [888-201-1014](tel:888-201-1014).
- Ururka qareenada degmadaada ayaa laga yaabaa inay ku caawiyaan.

## Xaq u yeelo inta lagu jiro racfaankaaga

---

Si aad xaq ugu yeelato dheefaha inta lagu jiro racfaankaaga, hubi inaad:

- Soo gudbiso codsigaaga toddobaadlaha ah.
- Sii wado hawlahaaga shaqo raadinta.
- Ka warbixi dakhli kasta oo aad hesho.
- Aad awoodo oo diyaar u tahay inaad shaqeyso.

Haddii racfaanka lagu go'aamiyo, waxaan ku siin doonaa dheefahaaga toddobaadyada aad buuxisay shuruudaha u-qalmitaanka oo aad gudbisay codsi toddobaadle ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan racfaanka, booqo [esd.wa.gov/appeal-info](http://esd.wa.gov/appeal-info).

# Tuugada dheefaha

**Khiyaanadu** waa danbi aad khatar u ah. Ogaanshaha iyo ka hortagga khiyaanada dheefaha shaqo la'aanta ayaa leh mudnaanta. Waxaan dib u eegeyanaa sheegashooyinka si jooqto ah si aan u hubinno in dheefaha lagu bixiyo si waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka.

## Tusaalooyinka khiyaanada dheefaha

- In aan la soo sheegin lacagta aad kasbatay markaad dheefaha qaadanayso.
- Ka run sheegid la'aanta sababta aadan ugu shaqaynayn loo-shaqeeyaha hore.
- Sheegista inaad awoodo oo aad heli karto xili aad jiran tahay, socdaalayso ama haddii kale aanad awoodin ama aanad heli karin inaad shaqeyso.
- Ka warbixinta inaad shaqo raadsatay xili aanad dhamaystirin hawlaha shaqo raadinta ee la ansixiyay.
- Xatooyada aqoonsiga qof kale si loogu xareeyo dheefaha shaqo la'aanta magaciisa.

## Sida looga fogaado ku xadgudubka dheefaha

Waxa ugu muhiimsan waa in daacad la ahaado. Haddii aad si ula kac ah isku daydo in aad dheef ku hesho adiga oo bayaan soo saaray ama na siiyay macluumaad been abuur ah, waxaad samaynaysaa khiyaano.


Haddii aadan hubin macluumaadka aad soo gudbiso ama haddii aadan garanayn waxa ay tahay inaad sameyso, wac [800-318-6022](tel:800-318-6022) si aad u caddeeyso. Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawinno.

## Ganaaxyada khiyaanada dheefaha

Ganaaxyada khiyaanada dheefaha waxaa ku jiri kara:

- Dib-u-bixinta dhammaan dheefaha aanad xaq u lahayn inaad hesho.
- Ganaax u dhexeeya 15% iyo 50% marka loo eego dheefaha ay ahayd inaad helin.
- Joojinta u-qalmitaan helitaanka dheefaha mustaqbalka 26 toddobaad iyo ilaa 104 toddobaad.
- In lagu xukumo dambi gudaha maxkamada gobolka iyo/ama maxkamadda federaalka.

## Waxa aan samayno si aan u joojino khiyaanada dheefaha

Qaar ka mid ah siyaabaha aan ku aqoonsanno khiyaanada waxaa ka mid ah:	Ka warbixi khiyaamo la tuhunsan yahay
Dib u eegida sheegashada.	Oonlaynka barta <a href="https://esd.wa.gov/fraud">esd.wa.gov/fraud</a> .
Isbarbardhigga dakhliga ay soo sheegaan shaqaalaha iyo loo shaqeeyayaashooda.	Iyadoo loo marayo Khadkayaga Laynka Lacag-la'aanta ah ee Khayaanada ka wac <a href="tel:800-246-9763">800-246-9763</a> .
Hubinta xogta gobolka iyo qaranka ee shakhsiyadka dhawaan la shaqaaleysiiyay si loo hubiyo in dadku aanay qaadan dheefaha kadib markay bilaabaan shaqada.	Talooyinka ku saabsan khiyaanada suurtagalka ah waxaa daba gal ku sameeya kooxdayada baarayaasha.
Xaqiijinta xiriirada shaqo raadinta.	
Dib u eegista xogta <a href="#">midawga</a>  ku xiran.	

# Lifaaqa

## Lifaaqa A – Shaacinnada sharciga ah

---

Waxda Employment Security Department waxay heshaa maalgelinta federaalka. Bayaanka soo socda, fadlan ogow in ereyga “qaataha” loola jeedo Employment Security.

### Fursad siman waa sharciga

Waa sharci darro in qaataha kaalmada maaliyadeed ee federaalka uu kugu takooro saabaha soo socda:

- Shakhsi kasta oo Maraykanka jooga, iyadoo lagu salaynayo isir, midab, diin, jinsi (ay ku jiraan uurka, dhalmada, iyo xaaladaha caafimaad ee la xidhiidha, fikradda jinsiga, heerka jinsiga, iyo aqoonsiga jinsiga), asalka wadanka (oo ay ku jiraan aqoonta Ingiriisiga xaddidan), da'da, naafada, ama ku fikirka siyaasadeed ama aaminsanaanta, ama;
- Ka-faa'iideyste kasta, codsade, ama ka qaybqaataha barnaamijyada dhaqaale ahaan lagu kaalmeeyo Workforce Innovation and Opportunity Act (Sharciga Title I ee Hal-abuurka Shaqada iyo Fursadaha), iyadoo lagu salaynayo heerka muwaadinimada qofka ama ka qaybqaadashada barnaamij kasta ama shaqo dhaqaale ahaan lagu caawiyo WIOA Title-I.

Qaatahu waa inuusan kugu takoorin mid ka mid ah meelaha soo socda:

- Go'aaminta cidda la aqbali doono, ama heli doonta, barnaamij kasta ama hawl kasta oo dhaqaale lagu caawiyo WIOA Title I:
- Bixinta fursadaha, ama ula dhaqmidda qof kasta si gaar markay qusayso, barnaamij ama hawl; ama
- Samaynta go'aannada shaqaalaynta ee maamulka, ama la xidhiidha, barnaamijka ama hawlaha noocaas ah.

Qaatayaasha kaalmada maaliyadeed ee federaalku waa inay qaadaan tillaabooyin macquul ah si ay u hubiyaan in xidhiidhka lala yeesho shakhsiyadka naafada ah ay waxtar u leeyihiin sida la mid ah dadka kale. Tani waxay ka dhigan tahay, marka la codsado oo kharash aan looga qaadin qofka shakhsiga, qaatayaasha waxaa looga baahan yahay inay siiyaan caawimo iyo adeegyo ku habboon shakhsiyadka naafada ah.

## Waxa la sameeyo haddii aad aaminsan tahay in aad la kulantay takoor

Haddii aad u malaynayso in lagugu sameeyay takoorid hoos timaada barnaamij ama hawl dhaqaale lagu caawiyo WIOA Title I, waxaad ku gudbin kartaa cabasho 180 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda xadgudubku dhacay.



### Si aad cabasho ugu gudbiso telefoon

Ka wac Employment Security's Equal Opportunity Office (Xafiiska Fursada Loo Siman yahay ee Amaanka Bulshada) lambarka [855-836-5598](tel:855-836-5598). Haddii aad qabto naafo maqal ama hadal, wac 711 si aad ula hadasho Washington Relay.



### Si aad cabasho ugu gudbiso iimeylka

imeyl ugu dir Employment Security's Equal Opportunity Office lambarka [esdgpeo@esd.wa.gov](mailto:esdgpeo@esd.wa.gov).



### Si aad cabasho ugu gudbiso boostada

Employment Security Department  
Equal Opportunity Office  
PO Box 9046  
Olympia, WA 98507

Aama u dir:

The Director - Civil Rights Center (CRC)  
U.S. Department of Labor  
200 Constitution Avenue, NW., Room, N-4123  
Washington, DC 20210



### Si aad cabasho ugu gudbiso oonlaynka

Raac tilmaamaha ku qoran webseedka "Civil Rights Center (Xarunta Xuquuqda Madaniga ah) ee Department of Labor (Waaxda Shaqaalaha)". Booqo [dol.gov/crc](http://dol.gov/crc).

Haddii aad cabashadaada u gudbiso qaataha, waa in aad sugtaa ilaa uu qaatuhu ka soo saarayo Ogeysiis qoran oo ah Talaabada Ugu Danbaysa, ama ilaa 90 maalmood ay dhaafto (hadba kii horeeya) kahor inta aanad cabashada u gudbin Civil Rights Center (Xarunta Xuquuqda Madaniga ah) (fiiri ciwaanka sare).

Haddii qaatuhu aanu ku siin Ogeysiis qoran oo ah Talaabada Ugu Danbaysa 90 maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta aad gudbisay cabashadaada, waxa aad ka dacwoon kartaa CRC kahor inta aadan helin Ogeysiiskaas. Si kastaba ha ahaatee, waa inaad u gudbisaa cabashadaada CRC 30 maalmood gudahooda ee 90-ka maalmood ee kama dambaysta ah (si kale haddii loo dhigo, 120 maalmood gudahooda ka dib maalinta aad cabashadaada u gudbisay qaataha).

Haddii qaatuhu uu ku siiyo Ogeysiis qoran oo ah Talaabada Ugu Danbaysa ee cabashadaada, laakiin aadan ku qanacsanayn go'aanka ama xallinta, waxaad ka dacwoon kartaa CRC. Waa inaad ku gudbisaa cabashadaada CRC 30 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda aad heshay Ogeysiiska Talaabada Ugu Danbaysa.

## Adeegyo loogu talagalay shakhsiyaadka naafada ah

Waxaanu samayn doonaa adeegyo si aanu kuugu fududeyno ka qayb qaadashadaada dhammaan barnaamijyada, hawlaha iyo adeegyada Employment Security. Si aad u codsato adeegga naafada, fadlan wac [844-395-6698](tel:844-395-6698) ama iimeyl u dir [ESDGPUIAccomms@esd.wa.gov](mailto:ESDGPUIAccomms@esd.wa.gov).

## Qarsoonaanta xogtaada ayaa muhiim noo ah

Waxaan raacnaa dhammaan sharciyada gobolka iyo federaalka ee ilaaliya macluumaadkaaga gaarka ah. Si lagaaga caawiyo isku xirka barnaamijyada loogu talagalay in lagugu soo celiyo shaqada, waxaanu la wadaagaynaa qayb ka mid ah macluumaadkaaga iskaashatadeena, sida WorkSource, loomana ogola inay cid kale la wadaagaan. Waxaan bixin karnaa:

- Xogtaada xiriirka.
- Taariikhda shaqada iyo shaqo raadinta.
- Xogta dadweynaha, sida da'da ama jinsiga.

Loo-shaqeeyayaashii hore iyo hay'adaha kale ee dawlad-goboleedka ama dawladda hoose ayaa laga yaabaa inay siiyaan wakaaladdayada wixii macluumaad ah, oo uu ku jiro lambarkaaga Social Security, ee loogu baahan yahay maamulka habboon ee sheegashadaada. Waxaan sidoo kale u isticmaalnaa Lambarkaaga Social Security si aan ugu sheegno qaddarka dheefaha aad hesho Internal Revenue Service (Adeegga Dakhliga Gudaha, IRS) si loo canshuuri karo.

## Lifaaqa B – Qaamuuska

---

Qaybtani waxa ay qeexaysaa ereyada sida caadiga ah loo isticmaalo iyo kuwa lasoo gaabshay. Waxaad ka heli kartaa qeexitaannada erayada dheeraadka ah bogga [esd.wa.gov/about-us/definitions-terms](https://esd.wa.gov/about-us/definitions-terms).

**Alternate base year (Sanadka aasaaska ee kale) (ABY)** - Gobolka Washington, Sanadka aasaaska ee kale ee codsadhaha ayaa ah 4-ta rubuc ee ugu dambeeya ee la dhammaystiro wakhtiga aad codsanayso dheefaha. Haddii aadan shaqaynin 680 saacadood sanad dheefeedka caadiga ah, waxa laga yaabaa inaad awoodo inaad xerayso codsi adigoo isticmaalaya sanad aasaaseedka beddelka ah.

**Racfaanka** – Haddii codsadeyaasha ama loo-shaqeeyayaashu ay diidaan go'aankayaga ku saabsan sheegashada shaqo la'aanta, waxay codsan karaan racfaan. Racfaanku waa codsi dhageysi ku saabsan go'aankayaga.

**Dhageysiga racfaanka** – Kulan lagu eegayo racfaanka dheefaha. Dhinac kasta (adiga iyo loo shaqeeyaha, inta badan) waxay u sheegi karaan sarkaalka dhegeysiga eex la'aanta ah waxa ay rumaysan yihiin in xaqiiqooyinka la xidhiidha ay la xiriiraan arrinta racfaanka. Waxaa laga yaabaa inaad haysato markhaatiyo. Waxaad waydiin kartaa su'aalo dhinaca kale. Markhaati kasta waxaa lagu baxshaa dhaar.

**Sanadka aasaaska** – Gobolka Washington, sannadka aasaaska ah ee codsadhaha waa 4-ta ugu horreysa ee 5-ta rubuc ee ugu dambeeya ee la dhammaystiray wakhtiga aad codsanayso dheefaha. Waa inaad ka shaqeysay 680 saacadood shaqo caymis leh inta lagu jiro sanadkaaga aasaasiga ah si aad ugu qalanto dheefaha shaqo la'aanta.

**Kordhinta dheefta** - Kordhinta dheefaha, marka la heli karo, waxay kuu oggolaanaysaa inaad hesho dheefo dheeraad ah kadib markaad hadda u qalanto inaad hesho dheefaha shaqo la'aanta caadiga ah.

**Asbuuca dheefta** – Waxay bilaabataa Axadda waxayna dhammaanaysaa saqda dhexe Sabtida soo socota.

**Sanadka dheefta** – Muddada 52-usbuuc ah ee aad ku heli karto dheefaha shaqo la'aanta ee sheegashada. Sannadka dheefta wuxuu bilaabmaa Axadda toddobaadka codsaduhu codsado dheefaha.

**Dheefaha** – Lacagta la siiyo shaqsiyaadka xaqa u leh.

**Codsiga** – Codsiga dheefaha shaqo la'aanta.

**Taariikhda dhaqangalka sheegashada** – Axadda toddobaadka ee uu bilaabmay codsigaagii hore ee dheefaha.

**Taariikhda dhammaadka sheegashada** – Sidoo kale loo yaqaan benefit year end (dhamaadka sanadka dheefta) (BYE), tani waa Sabtida ugu dambeysa ee sanadka dheefta. Tani waxay ku beegan tahay Sabtida, 52 todobaad kadib taariikhda dhaqan gal ee sheegashada.

**Shaqada la daboolayo** - Shaqo uu daboolayo caymiska shaqo la'aanta. Shaqada waa la daboolaa haddii loo-shaqeeyaha uu uga baahan yahay sharcigu inuu u sheego mushaharka iyo saacadaha shaqaalaha Employment Security, dawlada gobol kale ama dawladda federaalka.

**Khiyaannada** – Bixinta macluumaad been ah, been abuur ama si badheedh ah u qarinta xogta.

**Shaqada wakhti buuxa** – Shaqeeya 40 saacadood ama ka badan todobaadkii.

**Dakhliga guud** – Inta lacag ah ee aad ku hesho shaqada kahor cashuurta iyo jarista lacagaha kale.

**Maximum benefit amount (Cadadka ugu badan ee dheefta) (MBA)** – Qadarka ugu badan ee dheefaha aad heli karto inta lagu jiro sanadka dheefta. Gudaha Washington, MBA-gaagu waa 26 jeer qaddarkaaga dheefta toddobaadlaha ah ama 1/3 ee mushaharkaaga sannadka aasaasiga ah, hadba kan yar.

**Go'aaminta lacagta** – Warqad lagu soo diray ka dib markaad gudbis codsiga dheefaha. Waxay sharxaysaa haddii aad u qalanto, inta lacag bixintaadu noqon doonto toddobaad kasta, maximum benefit amount (qaddarka dheefta ugu badan) (MBA), iyo tafaasiisha kale ee sannadka codsigaaga. Tan waxaa ku jira dhammaan loo-shaqeeyayaasha aad u shaqeysay intii lagu jiray sanadka aasaasiga ah iyo mushaharka loo-shaqeeye kasta uu soo sheegay. Hubi inaad hubiso saxnaanta oo kala xiriir Claims Center lambarka [800-318-6022](tel:800-318-6022) si aad u saxdo khalad kasta.

**Dakhliga xaasilka** – Mushaharka aad u qaadato guriga, kadib cashuuraha iyo lacagaha la jaro.

**Lacagta dheeraadka ah** – Dheefaha aan ku siinnay kahor intaan ogaanin inaad u qalmin inaad hesho.

**Dheefaha qaybta ah** – Haddii aad shaqaynayso oo aad gudbis codsi toddobaadle ah, waxa aad u qalmi kartaa qayb lacagta kamid ah. Waa inaad ka warbixisaa dakhligaaga guud usbuuca aad dalbanayso, xataa haddii aan weli wax lacag ah lagu siin.

**Kala taga** – Marka adiga ama cidda aad u shaqayso joojisaan xidhiidhka wada shaqayneed. Tan waxa u sabab ah shaqo-ka-tagis, ka-saarid (cayrin), fasax maqnaansho, ka-hakin ama shaqo-ka-joojin (shaqo la'aan).

**Heegan** – Inta lagu jiro shaqo ka joojinta ku meel gaadhka ah, marka loo-shaqeeyuhu qorsheynayo inuu shaqaaleysiyo hal ama in ka badan oo shaqaale ah oo shaqada laga fadhiisiyey wakhti go'an gudaheed, Employment Security waxa laga yaabaa inay ansixiso codsiga ah in shaqaalaha la geliyo marxladda heegan. Shaqaalaha la ansixiyay uma baahna inay shaqo raadiyaan inta ay qaadayaan dheefaha shaqo la'aanta inta lagu jiro muddada sugitaanka ee la ansixiyay.

**Shaqada haboon** – Shaqo ku habboon xirfadahaaga, khibradaada, ama tababarka oo buuxisa mushaharka caadiga ah iyo shuruudaha aaggaaga. Haddii aad nafo tahay, oo ay ku jiraan cilado caafimaad oo ku meel gaar ah, shaqadu sidoo kale waa inay ammaan kuu tahay inaad qabato.

**Midawga ku xiran** – Xubin firfircoon oo buuxda oo urur shaqaale kamid ah oo shaqo ka hela hoolka shaqaalaynta ururka. Haddii aad ku jirto liiska shaqo la'aanta, sida ay xaqiijiyeen ururkaaga, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto dheefaha adiga oo diyaar u ah shaqada ururkaaga.

**Weekly benefit amount (Qadarka dheefta asbuuc kasta) (WBA)** – Qadarka aad xaq u leedahay in aad hesho kahor lacag jaris kasta.

## Lifaaqa C – Diiwaanka shaqo raadinta ee asbuuc kasta

Kula soco hawlaha shaqo raadintaada diiwaanka shaqo raadinta ee toddobaadlaha ah. Ku dar faahfaahinta hawl kasta (waxa, goorta, meesha iyo cidda lala sameeyay). Haddii ay suurtagal tahay, kaydi caddaynta, sida sawirka shaashadda ama xaqiijinta iimaylka. Diiwaan kasoo degso [esd.wa.gov/job-search-log](https://esd.wa.gov/job-search-log) ama koobi gareyso kan la socda buug-gacmeedkaan.

Hayso diiwaanka shaqo raadinta ugu yaraan 30 maalmood kadib dhamaadka [sanadkaaga dheefaha](#) ama marka aad hesho lacagtaadii ugu dambaysay ee [kordhinta dheefaha](#), hadba kii **danbeeya**.

Magaca (Sadeaad, Koobaad, Labaad): \_\_\_\_\_

Aqoonsiga SSN: \_\_\_\_\_

**TILMAAMAHA:** Fadlan adeegso khad madboow. Ha noo soo dilm diiwaankaaga ilaa maan ilaa codsamo maahaa. Waa inaad buuxisa diiwaan toddobaad kasta oo aad qaadata dheelaha shaqo la'aanta. Waa inaad haysta warar guud oo ah saddex xidhiidhiye oo loo-shaqeeyaha ah, hawlo WorkSource ay ansixiyay ama Hawlo kale oo la ansixiyay toddobaad kasta. **Hayso diiwaanka shaqo raadinta ugu yaraan 30 maalmood kadib dhamaadka sanadkaga** - caddeee dheelaha ama marka aad heshay lacagihii ugu dambeeyay ee kordhinta dheelaha<sup>1</sup>, hadba kii dambeeyay. Waxaa laga yaabaa maam xaqiijino xidhiidhka loo-shaqeeyahaaga. Hawlaha WorkSource ee la ansixiyay ama hawlaha kale ee la ansixiyay ee la qabtoy. Bixinta macluumaadka beenta ah waa khyayamo keeni karta in lagu dildo dheelahaaga shaqo la'aanta iyo gargaar iyo dheeraad ah.

Waxaad ka heli karta diiwaano badan xafiiska WorkSource ee deegaankaaga ama khadka internetka [esd.wa.gov/tib-search-tab](http://esd.wa.gov/tib-search-tab). Ixtiraac buug-gacmeedka loogu talagalay Shaqaalaha Shaqo-la'aanta ah si aad u hesho ilaacimo dheeraad ah oo ku saabsan dhammaystirka diiwaankaaga.

**XIRIRADA LOO SHAQEYAHA IYO HAWLAHA SHAQO RAADINTA**

**XIRIRKA 1** Taariikhda Xiriirka (BISHA/MAALINTA/SANADKA): \_\_\_\_\_

Shaqo noocaa ah ayaaad samaysay? Dooro mid:  
 Xiriirka loo shaqeeyaha  Shaqada WorkSource  Shaqo kale

Haddii kanu ahaa xidhiidhka loo shaqeeyaha, fadlan bixi xogtaam soo socota:  
 Ciwaanka shaqada ama lambarka ixtiraaca shaqada: \_\_\_\_\_

Magaca loo shaqeeyaha ama ganacsiga: \_\_\_\_\_  
 Sideed ula xiriiray? \_\_\_\_\_  
 Toos ugu tagay  Oonlaynka  Taleefanka  Imeylka  Boostada  
 Si kale: \_\_\_\_\_  
 Nooca xiriirka (dooro mid) \_\_\_\_\_  
 Cods/ Warqadda shaqada  Wareysi  Xog wareysi

Xogta xiriirka loo shaqeeyaha ama ganacsiga:  
 Ciwaanka: \_\_\_\_\_  
 Magaallada: \_\_\_\_\_ Gobalka: \_\_\_\_\_  
 Webseedka ama ciwaanka imeylka: \_\_\_\_\_  
 Lambarka teleefanka: \_\_\_\_\_

Haddii ay tani ahayd hawl la ansixiyay WorkSource, fadlan bixi macluumaadka soo socda:  
 Waa maxay shaqada aad qabatay: \_\_\_\_\_  
 Waa maxay codaymaha aad haysto: \_\_\_\_\_

Xageed ku qabatay hawshan?  
 Magaca xafiiska: \_\_\_\_\_  
 Magaallada: \_\_\_\_\_ Gobalka: \_\_\_\_\_

Haddii ay tani ahayd hawl kale, fadlan bixi macluumaadka soo socda:  
 Waa maxay shaqada aad qabatay: \_\_\_\_\_  
 Waa maxay codaymaha aad haysto: \_\_\_\_\_

**XIRIRKA 2** Taariikhda Xiriirka (BISHA/MAALINTA/SANADKA): \_\_\_\_\_

Shaqo noocaa ah ayaaad samaysay? Dooro mid:  
 Xiriirka loo shaqeeyaha  Shaqada WorkSource  Shaqo kale

Haddii kanu ahaa xidhiidhka loo shaqeeyaha, fadlan bixi xogtaam soo socota:  
 Ciwaanka shaqada ama lambarka ixtiraaca shaqada: \_\_\_\_\_

Magaca loo shaqeeyaha ama ganacsiga: \_\_\_\_\_  
 Sideed ula xiriiray? \_\_\_\_\_  
 Toos ugu tagay  Oonlaynka  Taleefanka  Imeylka  Boostada  
 Si kale: \_\_\_\_\_  
 Nooca xiriirka (dooro mid) \_\_\_\_\_  
 Cods/ Warqadda shaqada  Wareysi  Xog wareysi

Xogta xiriirka loo shaqeeyaha ama ganacsiga:  
 Ciwaanka: \_\_\_\_\_  
 Magaallada: \_\_\_\_\_ Gobalka: \_\_\_\_\_  
 Webseedka ama ciwaanka imeylka: \_\_\_\_\_  
 Lambarka teleefanka: \_\_\_\_\_

Haddii ay tani ahayd hawl la ansixiyay WorkSource, fadlan bixi macluumaadka soo socda:  
 Waa maxay shaqada aad qabatay: \_\_\_\_\_  
 Waa maxay codaymaha aad haysto: \_\_\_\_\_

Xageed ku qabatay hawshan?  
 Magaca xafiiska: \_\_\_\_\_  
 Magaallada: \_\_\_\_\_ Gobalka: \_\_\_\_\_

Haddii ay tani ahayd hawl kale, fadlan bixi macluumaadka soo socda:  
 Waa maxay shaqada aad qabatay: \_\_\_\_\_  
 Waa maxay codaymaha aad haysto: \_\_\_\_\_

**XIRIRKA 3** Taariikhda Xiriirka (BISHA/MAALINTA/SANADKA): \_\_\_\_\_

Shaqo noocaa ah ayaaad samaysay? Dooro mid:  
 Xiriirka loo shaqeeyaha  Shaqada WorkSource  Shaqo kale

Haddii kanu ahaa xidhiidhka loo shaqeeyaha, fadlan bixi xogtaam soo socota:  
 Ciwaanka shaqada ama lambarka ixtiraaca shaqada: \_\_\_\_\_

Magaca loo shaqeeyaha ama ganacsiga: \_\_\_\_\_  
 Sideed ula xiriiray? \_\_\_\_\_  
 Toos ugu tagay  Oonlaynka  Taleefanka  Imeylka  Boostada  
 Si kale: \_\_\_\_\_  
 Nooca xiriirka (dooro mid) \_\_\_\_\_  
 Cods/ Warqadda shaqada  Wareysi  Xog wareysi

Xogta xiriirka loo shaqeeyaha ama ganacsiga:  
 Ciwaanka: \_\_\_\_\_  
 Magaallada: \_\_\_\_\_ Gobalka: \_\_\_\_\_  
 Webseedka ama ciwaanka imeylka: \_\_\_\_\_  
 Lambarka teleefanka: \_\_\_\_\_

Haddii ay tani ahayd hawl la ansixiyay WorkSource, fadlan bixi macluumaadka soo socda:  
 Waa maxay shaqada aad qabatay: \_\_\_\_\_  
 Waa maxay codaymaha aad haysto: \_\_\_\_\_

Xageed ku qabatay hawshan?  
 Magaca xafiiska: \_\_\_\_\_  
 Magaallada: \_\_\_\_\_ Gobalka: \_\_\_\_\_

Haddii ay tani ahayd hawl kale, fadlan bixi macluumaadka soo socda:  
 Waa maxay shaqada aad qabatay: \_\_\_\_\_  
 Waa maxay codaymaha aad haysto: \_\_\_\_\_

**Ku hayso diiwaankaaga galkaaga.**

Employment Security Department waa shaqo-bixiye/Amnami loo siman yahay. Kaarmiyoinka iyo adeegyada koontada ayaa la heli kara marka ay codsadaan shaqsiyadaha maada ah. Adeegyada koontada luqadaha ee shaqsiyadaha luqadaha ayaa laga heli karaa laqab la'aan. Washington Relay Service: 711 EMS 10313 CC 7540-032-823 Rev 111622  
 1. Sanadkaga dheelaha waa muddada 52-asbuuc ah ee aad ku heli karto dheelaha shaqo la'aanta ee sheegashada. Codayn wanaq iktidama Aawada ixtiraacada marka koobad ee aad codsato dheelaha.  
 2. Kaahilinta dheelaha, marka la heli karo, wanaq kuu oggalaaryaan inaad hesho dheelaha aad ka heli karto hawlaha shaqo la'aanta codayn ah.





**Employment Security Department**  
WASHINGTON STATE

| **Oktoobar**

**EMS 8139 UCT SM (REV 10/25) SOMALI CC 7540-032-804 UI-12-0307**